# Wax-Ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Nidaamka Garsoorka, Xeer Lr.24/2020

***(Xeerka Nidaamka Garsoorka 2020)***

**Tusmada Xeerka (oo aano ku Darnay)**

**Wareegto Madaxweyne 24/03/2020**

**Aarar**

**QAYBTA KOWAAD QODOBBO GUUD**

Qodobka 1aad Magaca Xeerka
Qodobka2aad Erey-bixinta
Qodobka 3aad Ujeeddada Xeerkan
Qodobka 4aad Hay'adaha Garsoorka
Qodobka 5aad Astaanta Garsoorka
Qodobka 6aad Mabaadii'da Guud
Qodobka 7aad Luqadda Garsoorka
Qodobka 8aad Awoodaha Garsoorka
Qodobka 9aad Xaqa Dacwadda iyo Is-difaaca
Qodobka 10aad U-Furnaanshaha Dadweynaha ee Fadhiyada Maxkamadaha
Qodobka 11aad Qoraalka Xukunnada iyo Qaraarrada
Qodobka 12aad Reebbanaanta Faro-gelinta Geedi-socodka Dacwadda
Qodobka 13aad Dabbaqaadda Shuruucda
Qodobka 14aad Ka-Reebbanaanta Siyaasadda
Qodobka15aad Ku-Dabranaanta U-Hoggaansamida Xukunnada Garsoorka

**QAYBTA LABAAD MAXAKAMADAHA**

Qodobka 16aad Dhismaha Maxkammadaha
Qodobka 17aad Maxkamadda Degmada
Qodobka 18aad Awoodaha Guddoomiyaha Maxkamadda Degmada
Qodobka 19aad Dhismaha Maamul ee Maxkamadda Degmada
Qodobka 20aad Maxkamadda Gobolka
Qodobka 21aad Awoodaha Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka
Qodobka 22aad Dhismaha Maxkamadda Gobolka
Qodobka 23aad Maxkamadda Racfaanka
Qodobka 24aad Awoodaha Guddoomiyaha Maxkamadda Racfaanka
Qodobka 25aad Dhismaha maamul ee Maxkamadda Racfaanka
Qodobka 26aad Shaqaalaynta, shaqo-ka-saaridda iyo Waajibaadka Hawl-wadeennada kale ee Maxkamadaha Hoose
Qodobka 27aad Maxkamadda Sare
Qodobka 28aad Shuruudaha Laga Rabo Garsooraha Maxkamadda Sare
Qodobka 29aad Magacaabista Guddoomiyaha iyo Garsoreyaasha Maxkamadda Sare iyo Qaabka Xil-ka-Qaadistooda
Qoddobka 30aad Bannaanaanshaha Jagada Guddoomiyaha iyo Garsooraha Maxkamadda Sare
Qodobka 31aad Qaab-dhismeedka Maxkamadda Sare
Qodobka 32aad Qaybaha Maxkamadda Sare

Qodobka 33aad Fadhiyada Maxkamadda Sare
Qodobka 34aad Awoodaha iyo Hab-raaca Dhegeysiga Dacwadaha Maxkamadda Sare
Qodobka 35aad Awoodaha Guddoomiyaha Maxkamadda Sare
Qodobka 36aad Maxkamadda Dastuurka
Qodobka 37aad Awoodaha Maxkamadda Dastuurka
Qodobka 38aad Habka Loo Soo Jeedin Karo Dacwad Dastuuri ah
Qodobka 39aad Qaab-Shaqeedka Maxkamadda Dastuurka
Qodobka 40aad Maxkamadda Sare ee Cadaaladda
Qodobka 41aad Awoodaha iyo Habka Dacwad-Qaadista Maxkamadda Sare ee Cadaaladda

**QAYBTA SADDEXAAD XEER-ILAALINTA GUUD**
Qodobka 42aad Heerarka Xafiiska Xeer-Ilaalinta Guud
Qodobka 43aad Xilka iyo Waajibaadka Xafiiska Xeer-Ilaalinta Guud
Qodobka 44aad Qaab-Dhismeedka Xafiiska Xeer-Ilaalinta Guud
Qodobka 45aad Awoodaha Xeer-Ilaaliyaha Guud
Qodobka 46aad Xubnaha Xafiiska Xeer-Ilaalinta Guud
Qodobka 47aad Awoodaha Dacwad-Oogiseed ee Xubnaha Xafiiska Xeer-Ilaalinta Guud
Qodobka 48aad Shuruudaha Qofka Noqonaya Dacwad-Ooge (prosecutor).
Qodobka 49aad Shuruudaha Lagu Magacaabi Karo Xeer-Ilaaliyaha Guud
Qodobka 50aad Magacaabista iyo Xil-ka-Qaadista Xeer-Ilaaliyaha Guud
Qodobka 51aad Bannaanaanshaha Jagada Xeer-Ilaaliyaha Guud

**QAYBTA AFRAAD GUDDIDA CADAALADDA**
Qodobka 52aad Dhismaha Guddida Cadaaladda
Qodobka 53aad Xilka iyo Waajibaadyada Guddida Cadaaladda
Qodobka 54aad Xilka iyo Waajibaadka Guddoomiyaha Guddida Cadaaladda
Qodobka 55aad Waajibaadka Xoghayaha Guddida Cadaaladda
Qodobka 56aad Kulammada Guddida Cadaaladda
Qodobka 57aad Hab-Raaca soo Xulashada Xubnaha Guddida Cadaaladda ee Goleyaasha Sharci-Dejinta
Qodobka 58aad Shuruudaha xubnaha Guddida Cadaaladda ee Goleyaasha Sharci-Dejintu soo Magacaabayaan
Qodobka 59aad Waxyaabaha Ka Reebban xubinta Guddida Cadaaladda
Qodobka 60aad Xafiiska Maamulka iyo Agaasinka kormeerka ee Guddida Cadaaladda
Qodobka 61aad Hawl-Wadeennada Garsoorka
Qodobka 62aad Magacaabista Garsooreyaasha iyo Ku-Xigeennada Xeer-Ilaaliyaha Guud
Qodobka 63aad Tababarka Garsooreyaasha iyo Ku-Xigeennada Xeer- Ilaaliyaha Guud ee Cusub
Qodobka 64aad Dallacaadda Garsooreyaasha
Qodobka 65aad Shaqo-ka-Fadhiisashada Garsooreyaasha iyo Ku- Xigeennada Xeer-Ilaaliyaha Guud
Qodobka 66aad Dhaarta Xubnaha Waaxda Garsoorka
Qodobka 67aad Darajada Xubnaha Waaxda Garsoorka
Qodobka 68aad Magacaabis Gaar ah iyo Mid Ku-Meel-Gaadha
Qodobka 69aad Isku-Beddelka Garsooreyaasha iyo Ku-Xigeennada Xeer-Ilaaliyaha Guu
Qodobka 70aad La-taliye Shisheeye
Qodobka71aad Dhawrsanaanta Garsooraha ama Ku-Xigeenka Xeer-Ilaaliyaha Guud

Qodobka 72aad Shaqo-ka-Joojinta Garsooraha ama Ku-Xigeenka Xeer- Ilaaliyaha Guud
Qodobka 73aad Habka Qaadista Dacwadda Anshaxa
Qodobka 74aad Qaraarka Guddida
Qodobka 75aad Noocyada Qaraarrada Anshax-Marinta
Qodobka 76aad Ka-Cabashada Qaraarrada Anshax-Marinta ee Guddida Cadaaladda
Qodobka 77aad Xeer-Anshaxeedka Garsoorka

**QAYBTA SHANAAD XUQUUQAHA GARSOORKA**
Qodobka 78aad Mushaharka Hawl-Wadeenada Garsoorka
Qodobka 79aad Xuquuqda Hawl-Gabka iyo Dhimasha Hawl- Wadeennada Garsoorka
Qodobka 80aad Daryeelka Caafimaadka Hawl-Wadeennada Garsoorka

**QAYBTA LIXAAD QODOBBO ISKU DHAFAN**
***Cutubka I Shirweynaha Garsoorka***
Qodobka 81aad Shirweynaha Garsoorka
Qodobka 82aad Ka-soo-Qaybgaleyaasha Shirweynaha Garsoorka
Qodobka 83aad Awoodaha iyo Waajibaadka Shirweynaha Garsoorka
***Cutubka II Ka-Cabashada Go'aammada***
Qodobka 84aad Racfaannada iyo Cabashooyinka
Qodobka 85aad Muddada Racfaannada
Qodobka 86aad Adeegsiga Qareenka
***Cutubka III Fulinta Xukunnada***
Qodobka 87aad Fulinta Xukunnada Ciqaabta ah ee Dilka ah
Qodobka 88aad Fulinta Xuquuqaha Madaniga ah ee Weheliya Xukun Ciqaab ah
Qodobka 89aad Fulinta Dacwadaha Madaniga ah
Qodobka 90aad Mas'uuliyadda iyo Taxadirka Looga baahan Yahay Fulinta Xukunnada
Qodobka 91aad Dirayska garsoorka
Qodobka 92aad Fasaxa Garsoorka
Qodobka 93aad Doorka Wasiirka iyo Wasaaradda Cadaaladda ee Waaxda Garsoorka
Qodobka 94aad Awoodaha ay Madaxda Waaxaha Kale ee Dawladdu ku Leeyihiin Madaxda Waaxda Garsoorka iyo Xuduuddooda
Qodobka 95aad Xeer-Nidaamiyaha Xeerka Nidaamka Garsoorka
Qodobka 96aad Laalid
Qodobka 97aad Dhaqan-Galka Xeerka

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-492/032020 Taar: 24/03/2020

## Wareegto Madaxweyne

**Dhaqan-galka Wax-Ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Nidaamka Garsoorka, Xeer Lr.24/2020**

Markaan Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markaan Arkay: Qodobada 75aad ee Datuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markaan Arkay: Go'aanka Golaha Wakiillada Go'aan Lr.GW/KF-42/854/2020, ee ku taariikheysan 03/03/2020, ee ay ku ansixiyeen Wax-ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Nidaamka Garsoorka, Xeer Lr. 24/2020;

Waxaan soo-saaray;

Wax-ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Nidaamka Garsoorka Jamhuuriyadda Somaliland, Xeer Lr. 24/2020.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

## JAMHUURIYADDA SOMALILAND

## GOLAHA WAKIILADDU

**Markuu Arkay**:- Qodobad 76aad, 77aad, 78ad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

**Markuu Arkay**:- Qodobada 97aad, 98aad, 100aad, 101aad, 102aad, 103aad, 104aad, 105aad, 106aad, 107aad, iyo 108aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

**Marku Tixgaliyay**:- Soo jeedinta Madaxweynaha ee Wax- ka- bedallka iyo kaabista Xeerka Nidaamka Garsoorka Xeer Lr. 24/2020 ee ku taariikhaysan 23/12/2019.

**Wuxuu Ansixiyay**

Wax ka badelka iyo Kaabista Xeerka Nidaamka
Garsoorka Xeer Lr. 24/2020

## QAYBTA KOWAAD
## QODOBBO GUUD

### Qodobka 1aad
### Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa loogu yeedhayaa "**Wax-ka-bedelka iyo kaabista Xeerka Nidaamka Garsoorka Xeer Lr: 24/2020**".
Xeerkan waxa lagu magacaabayaa Xeerka Nidaamka Garsoorka ee Jamhuuriyadda Somaliland.

### Qodobka2aad
### Erey-bixinta

Ereyada hoos ku qoran, haddii aan si kale loogu sheegin Xeerkan gudihiisa, waxa loola jeedaa: -

**Garsoore***:* Waxaa loolla jeedaa Sharci-yaqaanka si xeerkan waafaqsan loogu magacaabay xilka garsoorenimo;

**Xubnaha Garsooridda:** Waxaa loolla jeedaa Maxkamadaha darajooyinka kala duwan;

**Qareen***:* Waxaa loolla jeedaa Sharciyaqaan haysta ruqsad qareennimo;

**Maxkamadaha Darajada koowaad**: - Waxaa loolla jeedaa Maxkamadaha Degmooyinka iyo Gobollada;

**Maxkamadaha Darajada**

**labaad**: - Waxaa loolla jeedaa Maxkamadaha Racfaanka ee Gobollada;

**Maxkamadaha Hoose**: Waxaa loolla jeedaa Maxkamadaha Degmoooyinka, Gobollada iyo Racfaanka;

**Maxkamadda Darajada Saddexaad**: Waxaa loolla jeedaa Maxakamadda Sare ee Jamhuuriyadda Somaliland;

**Maxkamadda Sare:** Waxaa loolla jeedaa Maxkamadda u sarraysa Waaxda Garsoorka ee Jamhuuriyada Somaliland;

**Maxkamadda Dastuurka**: Waxaa loolla jeedaa Maxkamadda Sare oo noqota Maxkamadda Dastuurka

**Dastuurka:** Waxaa loolla jeedaa Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

**Guddida Cadaaladda**: Waxaa loolla jeedaa Gudidda maamusha Waaxda Garsoorka.

**Qaraar:** Waxaa loolla jeedaa go'aan kasta oo aan dhammaystirin dulucda dacwadda;

**Xukun:** Waxaa loolla jeedaago'aan kasta oo laga gaadho dulucda dacwadda;

**Shaqaalaha Garsoorka**: Waxaa loolla jeedaa xubnaha Kaaliyeyaasha, Gaadhsiiyeyaasha iyo shaqaale kasta oo looga baahdo hawlaha Maxkamadaha iyo xeer-ilaalinta ee aan ahayn Garsoore ama ku-xigeen Xeer-Ilaaliye Guud;

**Dacwadaha tashiga ah**: Waxaa loolla jeedaa dacwadaha ay dhegaysataan, xukunna ka gaadhaan saddex garsoore iyo wixii ka badan;

**Dacwadaha aan tashiga ahayn:** Waxaa loolla jeedaa dacwadaha uu dhagaysto hal garsoore xukunna ka gaadho;

**Aqoon sharciyeed**: Waxaa loolla jeedaa Aqoon Sharci oo jaamacadeed;

**Aqoon Shareeco**: Waxaa loolla jeedaa Aqoon Shareeco oo jaamacadeed.

**Wasiirka:** - Waxaa loolla jeedssaa Wasiirka Cadaaladda.

**Guddiyada Sharci-dejinta**: Waxaa loolla jeedaa Guddiyada Waaxda Sharci-dejinta u qaabilsan arrimaha Waaxda Garsoorka;

**Sabool:** Waxaa loolla jeedda qof aan awoodin dhaqaale ahaan inuu iska bixiyo ajuuradii ku waajibtay ee Maxkamada iyo inuu qabsado qareen difaaca.

## Qodobka 3aad
## Ujeeddada Xeerkan

Ujeeddooyinka xeerkani waa:

1. In la helo xeer lagu nidaamiyo qaab-dhismeedka, maamulka, awoodaha iyo waajibaadka garsoorka;
2. In la sugo madax-bannaanida iyo xuquuqaha garsoorka;
3. In la abuuro garsoor sharci ku dhisan kuna shaqeeya;
4. In la caddeeyo xidhiidhka wada-shaqayneed ee hay'adaha garsoorka iyo hay'adaha kale ee Qaranka.

## Qodobka 4aad
## Hay'adaha Garsoorka

1. Qaranka Somaliland waxa uu leeyahay Hay'ad Garsoor oo loo igmaday arrimaha garsoorka.
2. Iyada oo la dhawrayo mabda'a is-ilaalinta iyo is-dheelli-tirka hay'adaha qaranka (check and balance), hay'adda garsoorku waa Waax ka soocan Waaxaha kale ee Qaranka ee Xeer-dejinta iyo Fulinta, taasi oo hawlaheeda iyo waajibaadkeeda shaqo u gudanaysa si madax- bannaan oo waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka u degsan dalka.
3. Hay'adda Garsoorku waxa ay ka koobantahay:
   (~~t~~*b*) Maxkamadaha,
   (~~u~~*t*) Xeer-Ilaalinta.

## Qodobka 5aad
## Astaanta Garsoorka

1. Garsoorku wuxuu yeelanayaa astaan u gaar ah oo ah miisaan ay kafadihiisu isku dheelli-tiran yihiin, midabkiisuna yahay doog, kefadaha dhexdoodana uu ka muuqdo dubbe taagan oo ku midabaysan sadexda midab ee calanka Jamhuuriyadda Somaliland.
2. Astaanta Garsoorku waxay ka muuqanaysaa xafiisyada iyo qoraalladda ka soo baxa xafiisyada Hay'adaha Garsoorka.
3. Astaanta Garsoorka looma isticmaali karo sifo ka baxsan hawlaha garsoorka.

## Qodobka 6aad
## Mabaadii'da Guud

1. Hay'adaha Garsoorka waa Hay'addo ka madax bannaan Waaxyaha kale ee Sharci Dejinta iyo Funlinta ee Qaranka.

2. Awooda Garsoorida Dacwadaha waxaa iska leh Garsooreyaasha oo keli ah cid kalena looma wareejin karo, marka laga reebo xafiisyada shareeecada ee haysta ruqsad diiwaangashan oo leh awood leh awood garsoor oo ku eg soo saaridda go'aammo iyo caddaymo loo cuskaday shareecada islamka.
3. Waxaa reeban Guddiyo leh awood iyo dabeecad Garsoor oo ay ka soo baxaan go'aano Ciqaab ah.
4. Waxa u bannaan dhinacyada is haya inay khilaafkooda u magacowdaan gudiyo ama ula tagaaan guddiyo dhex-dhexaadineed.

## Qodobka 7aad
## Luqadda Garsoorka

1. Luqadda garsoorku ku shaqeeyaa waa luqadda af-Soomaaliga.
2. Haddii isticmaalka luqado kale laga maarmi waayo waxaa luqadahaas lagu turjumayaa af-Soomaali.
3. Haddii dhakumantiga caddaymaha ee dhinacyadu maxkamadda u soo gudbiyaan uu ku qoranyahay luqad aan ahayn luqadda af-Soomaaliga, waxaa ku waajibahdhinaca soo gudbinaya in uu af-Somaali ku soo tarjumo.
4. Haddii dhinacyaha dacwaddu ka dhaxaysaa uu mid ka mid ahi yahay qof aan ku hadli karin afka Soomaaliga, garsooraha waxaa ku waajiba in uu u adeegsado turjumaan luqadda qofkaasi ku hadlayo si fiican u yaqaan.

## Qodobka 8aad
## Awoodaha Garsoorka

Maxkamaduhu waxa ay awood gaar ah u leeyihiin: -

1. In ay fasiraan micnaha xeerarka ka soo baxa Golayaasha dastuuriga ah iyo xeerarka degdegga ah iyada oo la raacayo Dastuurka;
2. Inay ka garsooraan khilaafka ka dhex abuurma laamaha Dawladda oo dhinac ah iyo xubno ka tirsan dadweynaha oo dhinac ah ama dadweynaha dhexdooda;
3. Inay ka garsooraan khilaalfka ka dhex abuurma laamaha dawlada;
4. Inay ka taliyaan muran kasta oo Ia xidhiidha waafaqsanaanta Dastuurka;
5. Maxkamaduhu marka awooddooda ku xusan qodobkan ay isticmaalayaan waxay xukunnadooda u cuskanayaan: -
   b. Shuruucda dalka u dejisan,
   t. Shareecada Islaamka,
   j. Dhaqanka Guud ee Bulshada,
   x. Cadaaladda Ijtimaaciga ah,
   kh. Arrimaha ku xusan b, j iyo x ee qodobkan waa in aanay ka hor iman Shareecada Islaamka.

## Qodobka 9aad
## Xaqa Dacwadda iyo Is-difaaca.

Iyadoo laga duulayo Qodobka 28aad ee Dastuurka oo ka hadlaya Xaqa dacwada iyo is-difaaca

1. Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu dacwaddiisa ka furto Maxkamadda Awoodda u leh si waafaqsan Xeerka.

2. Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu iska difaaco eed Maxkamadda horteeda looga soo jeediyey ama lagaga soo dacweeyey.
3. Xaaladdaha Xeerarku Tilmaamayaan, Qaranku wuxuu kafaallo qaadayaa inuu bixiyo difaac lacag la'aana iyadoo saboolkana laga dhaafi doono ujuurada Maxkamada
4. Saboolnimada ajuurada laga dhaafayo ama qareen loo qabanayo waxa qiimaynaya, qaraarna ku soo saaraya Guddoomiyaha Maxkamadda dacwaddu hor-taallo.

## Qodobka 10aad
## U-Furnaanshaha Dadweynaha ee Fadhiyada Maxkamadaha

Doodaha maxkamaduhu asal ahaan waa kuwo dhegeysigooda ay albaabadu u furan yihiin dadweynaha, xaaladaha uu sharcigu tilmaamayo mooyaane oo ay ka mid yihiin, kuwa ammaanka, anshaxa guud ama caafimaadka saamayn taban ku yeelanaya.

## Qodobka 11aad
## Qoraalka Xukunnada iyo Qaraarrada

1. Xukunnada iyo qaraarrada Maxkamaduhu waa in ay ahaadaan kuwo qoran oo sababaysan; waana in xukunnada:
   b) lagu xuso arrinta la isku maan-dhaafsan yahay,
   t) lagu xuso qodobbada xeer ee loo raacayo dacwadda,
   j) lagu xuso, lana fasiro qodobbada xeer ama daliilka Shareeco (Suuradda Qur'aanka iyo lambarka Aayadda, xadiiska Nebiga {NNKA}) ama marka intaa la waayo xalkii culimadu u badnayd (ijmaaca) ee arrinta la isku maan- dhaafsan yahay loo cuskadey,
   x) lagu caddeeyo marag-furrada maxkamadda horteeda ka sugmay iyo cadaymaha maxkamadda la hor-keenay,
   kh) lagu xuso wax walba oo faa'iido u leh sugidda cadaaladda,
   d) lagu miisaamo doodaha dhinacyada (ee qoraalka iyo afkaba leh) iyo marag-furrada iyo caddaymaha, lagagana hadlo sida ay marag- furrada iyo cadaymuhu u kala taageereen doodaha dhinacyada iyo sida wixii dhinacyada u sugmay u kala waafaqsan yihiin qodobbada xeer ee loo raacayo dacwadda iyo/ama daliilka Shareeco ama (marka labadaa la waayo) xalkii culimadu u badnayd (ijmaaca) iyo ugu dambayn haddii wax kale la waayo caddaaladda ijtimaaciga ah,
   r) Lagu soo saaro xukun waafaqsan tallaabooyinka ku xusan faqradaha 1(b) ilaa1(d) ee qodobkan.
2. Xukunnada loogu dhawaaqayo qofka ciqaabta la saarayo waxa lagu salaynayaa culayska fal- dembiyeedka, kayd-dembiyeedka eedaysanaha, qirashada iyo ka-garaabidda eedaysanaha ee fal- dembiyeedka, xilliga uu eedaysanuhu mujtamaca dib ugu soo noqonayo isaga oo dhaqan wanaagsan yeeshay; luqadda ku-dhawaaqista xukunkuna waxay ahaanaysaa mid aan dhaawac u geysaneyn ama hoos u dhigeyn karaamada qofka.

## Qodobka 12aad
## Reebbanaanta Faro-gelinta Geedi-socodka Dacwadda

Waxaa reebban in faro-gelin lagu sameeyo dacwad uu maxkamadda ka socdo gar-naqeedu, iyadoo loo adeegsanaayo warbaahin, abaabul qabyaaladdeed ama kooxeed, awood maamul ama siyaasadeed, saamaynta aragtida dadweynaha iyo nooc kasta oo kale oo faro-gelin ah.

## Qodobka 13aad
## Dabbaqaadda Shuruucda

1. Garsooruhu wuxuu u raacayaa dhegeysiga iyo xukun- ka-gaadhista dacwadaha ciqaabta ah iyo kuwa madaniga ahDastuurka iyo Xeerarka Dhaqangalka ah oo kaliya.
2. Dacwadaha kale oo dhan, Garsoorku wuxuu u raacayaa Dastuurka, xeerarka u dhigan; marka intaas wax loo cuskado looga waayo garsoorku waxaa uu arintaa u raacayaa Shareecada Islaamka Mad'habta Imaamu Shaafici.
3. Dacwadaha ka baxsan farqada 1aad ee Qodobkan Garsooraha waxa u banana inuu ku go'aan qaato xukun hore oo la nooc ah dacwadan isla markaana uu sababeeeyo hadii dabciga dacwada aan lagu faah-faahin Xeerarka dhaqangalka ah.

## Qodobka 14aad
## Ka-Reebbanaanta Siyaasadda

Hawl-wadeennada Garsoorka waxaa ka reebban inay ka mid noqdaan ururrada ama xisbiyada siyaasadda iyo ku- lug-lahaanshaha abaabul kasta oo siyaasadeed.

## Qodobka15aad
## Ku-Dabranaanta U-Hoggaansamida Xukunnada Garsoorka

1. Xukun kasta oo garsoor oo kama-dambeys ahi, wuxuu leeyahay awood sharci iyo awood fulineed.
2. Xukun kasta oo kama-danbays ah iyo amar kasta oo maxkamadeed waxaa waajib ku ah in cid kasta oo uu khuseeyaa ay sidiisa u fuliso.

## QAYBTA LABAAD
## MAXAKAMADAHA

## Qodobka 16aad
## Dhismaha Maxkammadaha

Iyadoo laga duulayo Qodobka 100aad ee Dastuurku qaab dhismeedka Maxkamadaha dalku waxay noqonayaan sidan: -

1. Maxkamadda Sare isla markaana ah Maxkamada Dastuurka sida ku cad Qodobka 101aad ee Dastuurka.
2. Maxkamadaha Racfaanka ee Gobolladda;
3. Maxkamadaha Gobolada
4. Maxkamadaha Degmooyinka;
5. Maxkamadaha Ciidamadda Qaranka.

## Qodobka 17aad
## Maxkamadda Degmada

1. Maxkamadda Degmadu waxay ku taallaa degmo kasta oo oo Jamhuuriyadda Somaliland ah, awooddeeduna waxay gaadhsiisan tahay xuduudaha degmada.
2. Maxkamadda Degmadu waxay fadhigeeda ku qabsan kartaa, meel kasta oo ku gudo jirta xuduudaha degmada.
3. Maxkamadda Degmadu waxay u qaybsantaa: -
   b) Qaybta Arrimaha Qoyska,
   t) Qaybta madaniga,
   j) Qaybta Ciqaabta,
   x) Qaybta Dacwadaha Fulinta,
   Kh) Qaybta Dacwadaha Ciqaabta Caruurta.
4. Maxkamadda Degmadu waxay awood u leedahay, marka la eego qiimaha iyo nooca Dacwadda, dhegeysiga dacwadaha hoos ku qoran:
   b) Dacwadaha Arrimaha qoyska,
   t) Dacwaha madaniga ah ee qiimahoodu gaadhsiisan yahay ilaa 30,000,000 (saddon malyan) Shilin, iyo
   J) Dacwadaha ciqaabta ee ciqaabtoodu tahay ugu badnaan 3(saddex) sano ama/iyo ganaax lacageed oo aan ka badnayn 3,000,000 (sadex milyan) Shilin.
5. Maxkamadda Degmadu waxa kale oo ay awood gaar ah u leedahay arrimahan soo socda:
   b) Sugidda qoraallada iyo caddaymaha sharci;
   t) Qaybinta dhaxalka;
   j) Xaqidda Nabarrada, dhaawacyada iyo qoomaha;
   x) Oggolaanshaha iyo diiwaan-gelinta mas'uuliyadda xannaanaynta carruurta;
   kh) Diiwaan-gelinta iyo ansixinta heshiisyada Guurka (Meherka) iyo furiinka;
   d) Hawlaha kale ee xeer u xilsaaro.

## Qodobka 18aad
## Awoodaha Guddoomiyaha Maxkamadda Degmada

1. Guddoomiyaha Maxkamadda Degmadu wuxuu awood u leeyahay:
   (b) In uu qaybiyo dacwadaha soo gala Maxkamadda una magacaabo mid walba garsoore dhegeysta ama uu isagu galo;
   (t) In uu ka jawaabo durista garsooreyaasha Maxkamadda, marka la duro ama laga cawdo;
   (j) In uu hawl-galiyo, kormeero, kuna daba-galo Hawlahooda dhammaan hawl wadeennada maxkamadda;
   (x) In uu saxeexo dhammaan caddaymaha mucaamalaadka ee ay qabato Maxkamaddu;
   (kh) In uu ka war-bixiyo hawlaha garsoor iyo maamul ee Maxkamadda, marka Guddida Cadaaladda ama Guddoomiyaha Maxkamadda Racfaanku sidaas ka dalbo, furanayo, ka dib markuu hubiyo waafaqsanaantooda sharciga;
   (r) In uu hubiyo saboolnimada qofka dalbanaya in ajuurada laga dhaafo, kana soo saaro qaraar uu ku oggolaanayo ama ku diidayo ka- dhaafidda ajuurada qofkaa;
   (s) Inuu ilaaliyo habsami-u-socodka hawlaha Maxkamadda;
   (sh) In uu ilaaliyo sumcadda, haybadda iyo kalsoonida bulshada ee Maxkamadda;
   (dh) In uu diyaariyo, gudbiyana baahiyaha Maxkamadda;

(c) In uu wax ka qabto cabashooyinka laga sheegto Maxkamadda;
(g) In uu ilaaliyo muddada garsugeyaasha Maxkamadda u xidhan;
(f) In uu ilaaliyo, kana war-hayo agabka iyo hantida Maxkamadda,
(q) In uu qiimeeyo, kana war-bixiyo hawl- wadeennada Maxkamadda;
(k) In uu xidhiidhiyo Maxkamadda iyo Maxkamadaha ka sarreeya ama hay'adaha kale ee ay shaqo-wadaagta leeyhiin;
(l) In uu fuliyo amarrada maamul ee Guddida Cadaaladda iyo Guddoomiyaha Maxkamadda Racfaanka ee uu hoos-yimaaddo;
(m) In uu siiyo fasax aan ka badnayn 7 (todoba) cisho Garsoorayaasha maxkamadiisa Degmada;
(n) In uu fuliyo hawlaha kale ee Xeerkan, xeerarka kale ee dalka ama xeer-nidaamiyeyaasha xeerkan ka dheegmaa u xil- saaraan.

2. Haddii Guddoomiyaha Maxkamadda Degmadu uu ka maqnaanayo shaqada muddo aan kabadnayn 7 (todoba) cisho, waxaa xilka ku sii simaya garsooraha uu Guddoomiyaha Maxkamadda Racfaanku u sii magacaabo xilkaas ku-meel-gaadh ahaan; haddii se Guddoomiyaha Maxkamadda Degmadu uu shaqada ka maqnaanayo mudo ka badan 7 (todoba) cisho kana badnayn 30(soddon) cisho, waxaa ku-simaha u magacaaba Guddoomiyaha Maxkamadda Sare. Haddii uu Guddoomiyaha Maxkamadda Degmadu uu shaqada ka maqnaanayo 30 (soddon) cisho wax ka badan, waxaa arintiisa ka go'aan-gaadheysa, guddoomiyenimada maxkamadana cid u sii magacaabaysa Guddida Cadaaladda.

## Qodobka 19aad
## Dhismaha Maamul ee Maxkamadda Degmada

Maxkamadda Degmadu waxay ka kooban tahay:

1. Guddoomiye,
2. Garsooreyaal,
3. Tababarteyaal Garsoore,
4. Kaaliyeyaal uu madax u yahay Kaaliye Sare,
5. Gaadhsiiyeyaal, iyo
6. Shaqaale kale wixii loo baahdo.

## Qodobka 20aad
## Maxkamadda Gobolka

1. Maxkamadda Gobolku waxay ku taallaa magaalo- madaxda Gobol kasta, awooddeeda Maxkamadeedna waxay gaadhsiisan tahay xuduudaha Gobolka ay ku Taal.
2. Makamadda Gobolku waxay fadhigeeda ku qabsan kartaa goob kasta oo ku guddo jirta xuduudaha Gobolka.
3. Maxkamadda Gobolku waxay awood u leedahay dhegeysiga iyo go'aan-ka-gaadhista:
(b) Dacwadaha xuquuqda shaqaalaha; badan yahay 30,000,000 (saddonmalyan) Shilin;
(j) Dacwadaha ciqaabta ah ee aanay Maxkamadda Degmadu awood u lahayn dhegeysigooda;
(x) Dacwadaha ciqaabta carruurta ee ay awoodda u leedahay;
(kh) dacwadaha madaniga ah ee dawladu dhinac ka tahay;
(d)dacwadaha madaniga ah ee ay hay'adaha caalamiga ah, ama aan caalamiga ahayni dhinac ka yihiin;

(r) Ansixintaama diidmada go'aammada dhexdhexaadinta;
(s) Dacwadaha ganacsiga;
(sh) fulinta xukunnada iyo qoraallada kale ee awood fulineed leh ee qiimahoodu ka badan yahay 30,000,000 (saddon malyan) Shilin;
(dh) dacwadaha ka dhasha qandaraasyada ay bixiyaan dawladda, ganacsatada, hay'adaha waddaniga ah ama caalamiga ahi;
(c) Dacwadaha la xidhiidha cabashada go'aammada doorashada goleyaasha degaanka;
(g) dacwadaha fulinta ee heshiisyada nootaayooyinka lagu galay;

4. Maxkamadda Gobolku waxay yeelan kartaa Qaybahan soo socda:
(b) Qaybta Dacwadaha Madaniga ah;
(t) Qaybta Dacwadaha Ciqaabta;
(j) Qaybta Dacwadaha Cashuuraha iyo Maaliyadda;
(x) Qaybta Dacwadaha Ciqaabta Carruurta (Juvenilles);
(kh) Qaybta Dacwadaha Fulinta;
(d) Qaybta Dacwadaha Doorashooyinka Goleyaasha Deegaannada ee xeerka doorashooyinku awoodda u siiyey;
(r) Qaybta Dacwadaha Shaqaalaha (shaqaalaha rayidka ah iyo ka dawlada) iyo Dacwadaha Ganacsiga;

5. Qaybta Dacwadaha Ciqaabtu waxay u qaybsantaa laba qaybood:
(b) Laanta Dacwadaha Tashiga ah (Assize Section);
(t) Laanta Dacwadaha aan Tashiga ahayn (General Section).

6. Laanta Dacwadaha aan Tashiga ahayni waxay awood u leedahay, dhegeysiga dacwadaha Ciqaabta ah ee uu xadhigoodu ka badan yahay 3 (saddex) sano, kana hooseeyo 10 (toban) sano, waxaana dhegeysan kara hal garsoore oo keli ah.

7. Laanta Dacwadaha Ciqaabta Tashigaahi waxay awood u leedahay dhegeysiga iyo go'aan-ka- gaadhista dembiyada ciqaabtoodu tahay 10 (toban) sano oo xadhig iyo wixii ka badan, waxaana dhegeysanaya 3 (saddex) garsoore oo ka tirsan Maxkamadda Gobolka oo uu Guddoominaayo Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolku.

8. Haddii la duro garsoore haya dacwad aan tashi ahayn ama garsoore ka mid ah garsooreyaasha haya dacwad tashi ah, waxa beddelkiisa soo magacaabaya Guddoomiyaha Maxkamada Gobolka; haddii se la duro Guddoomiye dacwad tashi ah ama la wada duro Guddomiyaha iyo garsooreyaasha dacwadda kula jira, waxa Guddoomiyaha laduray ama Guddoomiyaha iyo garsooreyaasha la wada duray beddelkooda soo magacaabaya Guddoomiyaha Maxkamadda Racfaanka.

9. Qaybta Dacwadaha Madanigu waxay u qaybsantaa:
(b) Laanta Dacwadaha Madaniga ee Tashiga ah oo dhegeysanaysa dacwadaha madaniga ah, ganacsiga ah, xuquuqda shaqaalaha ee qiimahoodu gaadho ama ka badan yahay 200,000,000 (laba boqol) malyan oo Shilin, waxaana dhegeysanaya saddex garsoore oo Maxkamadda ka tirsan oo midkood gudoominayo dhegeysiga;
(t) Laanta Dacwadaha Madaniga ee aan Tashiga ahayn oo dhegeysanaysa dacwadaha madaniga ah, ganacsiga ah, xuquuqda shaqaalaha iyo dacwadaha kale ee qiimahoodu ka yar yahay waxaana dhegeysanaya hal garsoore oo Maxkamadda ka tirsan.

10. Laamaha Tashiga Dacwadaha Madaniga iyo Ciqaabta waxaa go'aankoodu ansaxayaa markay isku raacaan laba garsoore iyo wixii ka badan.

## Qodobka 21aad
## Awoodaha Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka

1. Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolku wuxuu awood u leeyahay:
(b) Qaybinta dhammaan dacwadaha soo gala Maxkamadda Gobolka;
(t) hawl-gelinta, kormeeridda iyo ku-daba-gelidda hawlahooda dhammaan hawl-wadeennada Maxkamadda Gobolka;
(j) Ka-jawaabidda iyo ka-go'aan-gaadhiddacabashooyinkaiyo durista laga keeno garsoorayaashaMaxkamadda Gobolka iyo shaqaalaha kale ee Maxkamadda.
(x) Guddoominta iyo dhegeysiga dacwadaha tashiga, dacwadaha ciqaabta caruurta iyo kuwa kale ee culus haddii aanay jirin sabab sharci oo u diidaysa;
(Kh) saxeexidda warbixinta Maxkamadda Gobolka ee Gudidda Cadaaladda ama Guddoomiyaha Maxkamadda Racfaanku soo weydiiyo;
(d) Oggolaanshaha dacwadaha Maxkamada laga furanayo, ka dib markuu hubiyo waafaqsanaantooda sharciga;
(r) Hubinta saboolnimada qofka dalbanaya in ajuurada laga dhaafo iyo ka-soo-saaridda qaraar uu ku oggolaalnayo ama ku diidayo ka- dhaafidda ajuurada qofkaas;
(s) Habsami-u-socodsiinta hawlaha Maxkamadda;
(Sh) Ilaalinta sumcadda, haybadda iyo kalsoonida bulshada ee Maxkamadda;
(DH) Diyaarinta iyo gudbinta baahiyaha Maxkamadda;
(c) Wax-ka-qabashada cabashooyinka hawl- wadeennada iyo dadweynaha dacwaduhu ka yaalaan Maxkamadda;
(g) Illaalinta muddada garsugeyaasha Maxkamadda u xidhan;
(f) Illaalinta iyo ka-war-haynta agabka iyo hantida Maxkamadda;
(q) ka-war-bixinta iyo qiimaynta hawl-wadeennada Maxkamadda;
(k) Xidhiidhinta Maxkamadda iyo Maxkamadaha ka sarreeya ama hay'adaha kale ee ay shaqo wadaagta leeyhiin;
(l) Fulinta amarrada maamul ee Guddida Cadaaladda iyo Gudoomiyaha Maxkamadda Racfaanka ee uu hoos tago;
(m) Fasax siinta garsoorayaasha Maxkamadiisa Gobolka mudo aan ka badnayn 7 (todoba) cisho;
(n) Hawlaha kale ee Xeerkan, xeerarka kale ee dalka ama xeer-nidaamiyeyaasha ka dheegma xeerarkaasi u xil-saaraan.

2. Haddii Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolku uu ka maqnaanayo shaqada muddo aan ka badnayn 7(todoba) cisho, waxaa xilkiisa ku sii simaya garsooraha uu Guddoomiyaha Maxkamadda Racfaanku u sii magacaabo xilkaas ku meel-gaadh ahaan; haddii se Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolku uu shaqada ka maqnaanayo muddo ka badan 7 (todoba) cisho kana badnayn 30 (soddon) cisho, waxaa ku simaha u magacaabaya Guddoomiyaha Maxkamadda Sare. Haddii uu Gudoomiyaha Maxkamadda Gobolku uu shaqada ka maqnaanayo 30 (soddon) cisho wax ka badan, waxaa arintiisa ka go'aan Gaadhaysa, gudoomiyenimada Maxkamaddana cid u sii magacaabaysa Gudidda Cadaaladda.

## Qodobka 22aad
## Dhismaha Maxkamadda Gobolka

Dhismaha Maamul ee Maxkamadaha Gobolku waa:

1. Gudoomiye,
2. Garsooreyaal,
3. La-Taliyeyaal iyo khabiirro,
4. Kaaliyeyaal uu madax u yahay Kaaliyaha Sare,
5. Gaadhsiiyayaal, iyo

6. Shaqaale kale wixii loo baahdo.

## Qodobka 23aad
## Maxkamadda Racfaanka.

1. Xarunta Maxkamadda Racfaanku waxay ku taallaa magaalo madaxda Gobol kasta.
2. Maxkamadda Racfaanku waxay hawlaheeda Maxkamadeed ku qabsan kartaa meel kasta oo gudaha xuduudaha Gobolka ah,
3. Guddoomiyaha Maxkamadda Racfaanku waa sarkaalka Gobolka ugu sarreeya xagga hawlaha garsoorka, wuxuuna kormeer idaari ah ama maamul ah ku leeyahay inta xuduudda Gobolkiisa ah oo ku saabsan socodka hawlaha Maxkamadaha Gobolka, Degmooyinka iyo Xabsiyada.
4. Maxkamadda Racfaanku waxay go'aan ka gaadhaa, dacwadaha racfaannada looga soo qaato xukunnada Maxkamadda darajada koowaad.
5. Maxkamadda Racfaanku waxay leedahay qaybaha soo socda:
   (b) Qaybta Dacwadaha Ciqaabta;
   (t) Qaybta Dacwadaha Madaniga;
   (j) Qaybta Dacwadaha Qoyska;
   (x) Qaybta Dacwadaha Ciqaabta Carruurta;
   (kh) Qaybta Dacwadaha, Cashuuraha Maaliyada iyo Ganacsiga;
   (d) Qaybta Dacwadaha Xuquuqda Shaqaalaaha;
   (r) Qaybta Dacwadaha Xuquuqaha ka Dhasha Heshiisyada Qandaraasyada Hay'adaha Caalamiga ah.
6. Qaybta Dacwadaha Ciqaabtu waxay ka kooban tahay:
   (b) Laanta Dacwadaha Ciqaabta aan Tashiga ahayn oo dhegeysata racfaannada laga soo qaato Maxkamadaha Degmada iyo Qaybta Ciqaabta aan Tashiga ahayn ee Maxkamadda Gobolka;
   (t) Laanta Dacwadaha Ciqaabta Tashiga ah oo dhegeysata racfaannada laga soo qaato Laanta Dacwadaha Ciqaabta ee Tashiga ah ee Maxkamadaha Gobolka.
   (j) Laanta Ciqaabta Dacwaddaha Caruurta oo dhegeysata racfaannada laga soo qaato Laanta Ciqaabta Dacwadaha Caruurta ee Maxkamadda Gobolka.
7. Qaybta Dacwaddaha Madanigu waxay u Qaybsantaa:
   (b) Laanta Dacwadaha Madaniga aan Tashiga ahayn oo dhegeysata racfaannada laga soo qaato Maxkamadaha Degmada iyo Qaybta Madaniga aan Tashiga ahayn ee Maxkamadda Gobolka.
   (t) Laanta Dacwadaha Madaniga Tashiga ah oo dhegeysata racfaannada laga soo qaato Laanta Dacwadaha Madaniga Tashiga ah ee Maxkamadda Gobolka.
8. Racfaannada madaniga iyo ciqaabta ee tashiga ah waxa Maxkamadda Racfaanku u dhegeysataa si la mid ah sida loogu dhegeysto darajada Maxkamadda Gobolka.
9. Maxkamadda Racfaanku waxay awood gaaraah u leedahay, aqoonsiga xukunnada iyo qoraallada rasmiga ah ee ka dhaca dal kale iyo cabashada laga keeno isla qoraallada la aqoonsaday.

## Qodobka 24aad
## Awoodaha Guddoomiyaha Maxkamadda Racfaanka

Guddoomiyaha Maxkamadda Rafcaanku wuxuu awood u leeyahay:
1. Qaybinta dacwadaha soo gala Maxkamadda Rafcaanka;
2. Guddoominta dhegeysiga dacwadaha tashiga ah ee soo gala Maxkamadda

Rafcaanka;
3. Ka-jawaabidda cabashooyinka iyo durista laga keeno Guddoomiyeyaasha Maxkamadaha Degmooyinka, Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka, Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka iyo garsooreyaasha lala duro;
4. Saxeexidda isticmaalka miisaaniyadda u qorshaysan Maxkamadaha ee gobolkiisa;
5. Kormeeridda hawsha garsoorka iyo garsooreyaasha gobolkiisa;
6. Isku-beddelka kaaliyeyaasha iyo shaqaalaha ka hawl-gala xuduudda Gobolkiisa, isagoo la socodsiinaya Guddoomiyaha Maxkamadda Sare;
7. U-gudbinta warbixinahasaddex-biloodka ah Guddida Cadaaladda, hadii ay u baahdaan labada gudi-hoosaad ee Golayaasha Xeer-dejintu waxay ka dalban karaan Warbixin markay Kormeer Gobolada ku tagaan.
8. Illaalinta sumcadda, haybadda iyo kalsoonida bulshada ee Maxkamadda Racfaanka iyo maxkamadaha hoos yimaadda;
9. Diyaarinta iyo gudbinta baahiyaha Maxkamadda Racfaanka iyo Maxkamadaha hoos yimaadda;
10. Wax-ka-qabashada cabashooyinka laga keeno Maxkamadda Racfaanka iyo maxkamadaha hoos yimaadda;
11. Kordhinta muddada garsugenimo, marka ay lama huraan tahay;
12. Hawl-gelinta iyo ku-dabagalka hawsha hawl-wadeennada Maxkamadda Racfaanka;
13. Ilaalinta iyo ka-warhaynta agabka iyo hantida Maxkamadda racfaanka iyo maxkamadaha hoos yimaadda;
14. Ku-gacan-siinta habsami u-gudashada hawlahooda hawl-wadeennada Maxkamadda Racfaanka iyo Maxakamadaha hoos yimaadda;
15. Qiimaynta iyo ka-warbixinta hawl-wadeennada Maxkamadaha Hoose ee awooddiisa hoos yimaadda;
16. Xidhiidhinta Maxkamadaha Hoose ee awooddiisa hoos yimaadaiyo hay'adaha Garsoorka heer Qaran;
17. Isku-xidhka hawlaha iyo wada-shaqaynta hay'adaha garsoorka Gobolka iyo isku-duwaha Wasaaradda Cadaaladda ee gobolka, Maxkamada Sare, labada Guddi-hoosaad ee goleyaasha Sharci- dejinta u qaabilsan arrimaha garsoorka;
18. Fulinta amarrada maamul ee Guddida Cadaaladda iyo Guddoomiyaha Maxkamadda Sare;
19. Ku-dabbaqidda sharciyada toosinaya ama tilmaamaya habsami-u-socodka hawlaha Maxkamadaha awooddiisa hoos yimaadda;
20. Go'aan-ka-gaadhidda khilaafaadka garsoor iyo maamul ee Maxkamadaha awooddiisa hoos yimaadda;
21. Xallinta khilaafka hay'adaha garsoorka iyo hay'adaha kale ee Qaranka ee Gobolkiisa;
22. Diyaarinta, raadinta, u-ololaynta baahiyaha garsoor ee gobolkiisa;
23. Kormeeridda, ka-talo-bixinta iyo ka-warbixinta mashaariicda garsoorka la xidhiidha ee Gobolkiisa laga fulinayo;
24. U-magacaabiddagarsooreyaasha Maxkamadaha hoos yimaadda dhegeysiga ama ka-qayb-galka dacwad ka socota Maxkamad kale oo awooddiisa hoos timaadda, marka ay lama huraan noqoto, isagoo tix-gelinaya darajada garsooreyaasha;
25. Kormeeridda, ilaalinta iyo dayac-tirka dhammaan hantida garsoorka ee Gobolkiisa;
26. Ilaalinta anshaxa garsoor ee hawl-wadeennada awooddiisa hoos yimaadda;

27. Dacwad-u-kala-wareejinta laba degmo oo isla gobolka ah ama gobolka iyo degmo ka mid ah gobolka arrimo nabad-gelyo dartood;
28. Ka-soo-saaridda qaraar waafaqsan xeerka, marka la duro Guddoomiyeyaasha Maxkamadaha darajada kowaad ee gobolka, ama la wada duroGuddoomiyeyaasha Maxkamadaha darajada kowaad ee gobolka iyo garsooreyaal dacwad kula jira;
29. Hirgelinta barnaamijyada horumarinta iyo tayaynta garsoorka ee gobolkiisa;
30. Fasax-siinta Garsoorayaasha maxakamada hoose ee isga hoos-yimaada mudo aan ka badnayn 15 (shan iyo toban) cisho;
31. Gudashada hawlaha kale ee Xeerkan, xeerarka kale ee dalka ama xeer-nidaayeyaasha ka dheegmaa u xil-saaraan.

## Qodobka 25aad
## Dhismaha maamul ee Maxkamadda Racfaanka

Dhismaha Maamul ee Maxakamadaha Racfaanku waa sidan hoos ku cad:
1. Guddoomiye;
2. Garsooreyaal;
3. La-taliyeyaal iyo khabiirro;
4. Agaasin maamul;
5. Kaaliyeyaal uu madax u yahay Kaaliye Sare;
6. Gaadhsiiyeyaal, iyo
7. Shaqaale kale wixii loo baahdo.

## Qodobka 26aad
## Shaqaalaynta, shaqo-ka-saaridda iyo Waajibaadka Hawl-wadeennada kale ee Maxkamadaha Hoose

Gudidda Cadaaladdu shaqaalaha Maxkamadaha ee aan garsoorayaasha ahayn waxay shaqaalayntooda iyo shaqa ka saaristooda u raacaysaa Xeerka Shaqaalaha Daawlada sida uu dhigayoQodobka 108aad ee Dastuurka.

## Qodobka 27aad
## Maxkamadda Sare.

1. Maxkamadda Sare waa Maxkamadda ugu sarraysa Garsoorka Jamhuuriyadda Somaliland.
2. Xarunta Maxkamadda Sare waxay kutaallaa magaalo-madaxda dalka.
3. Maxkamadda Sare marka ay lagama maarmaan u aragto, waxay fadhigeeda ku qabsan kartaa meel kasta oo ka mid ah gudaha xuduudaha dalka Somaliland, iyadoo awood u leh (Jurisdiction) go'aan- ka-gaadhidda dacwadaha ka dhaca dalka ee racfaanka looga soo qaato.
4. Maxkamadda Sare waxay ka kooban tahay Guddoomiyaha Maxkamadda Sare iyo ugu yaraan 4 garsoore iyadoo loo kordhin karo hadba sida loogu baahdo si waafaqsan Qodobka 101aad ee Dastuurka.
5. Maxkamadda Sare waxay leedahayGuddoomiye-ku- Xigeen, waxaana ahgarsooraha ugu darajo sarreeya garsooreyaasha Maxkamadda Sare.
6. Maxkamadda Sare waxay leedahay kaaliyeyaal iyo hawl-wadeenno kale intii ay u baahato.

## Qodobka 28aad
## Shuruudaha Laga Rabo Garsooraha Maxkamadda Sare.

Qofka loo magacaabayo garsoore Maxkamadda Sare waa inuu yeesho shuruudahan hoos ku cad:

1. Waa in uu u dhashay Somaliland;
2. Waa in aanay da'diisu ka yarayn 40sano kana weynaan 65sano;
3. Waa in uu Shahaado Jaamacadeed oo xagga Sharciga ah kahaystaa jaamacad la aqoonsanyahay;
4. Waa in uu leeyahay waayo-aragnimo aan ka yarayn isugeyn 10 (toban) sannadood kuna soo shaqeeyay Guddoomiye ama/iyo Garsoore Maxkamad Racfaan ama/iyo Xeer-Ilaaliye Guud ama/iyo Qareen ama/iyo macallin jaamacad ka dhiga sharciga;
5. Waa inuu muslim yahay kuna dhaqmo Diinta Islaamka;
6. Waa in aanu ka tirsanayn xisbi/urur siyaasadeed;
7. Waa in uu yahay qof sumcad wanaagsan iyo magacba ku leh garsoorka dhexdiisa.

## Qodobka 29aad
## Magacaabista Guddoomiyaha iyo Garsoreyaasha Maxkamadda Sare iyo Qaabka Xil-ka-Qaadistooda

1. Guddoomiyaha Maxkamadda Sare waxaa soo magacaaabaya Madaxweynaha, isagoo la tashanaya Guddida Cadaaladda, waxaana cod hal dheeri ah ku oggolaanaya ama ku diidaya Golaha Wakiillada iyo Golaha Guurtida oo fadhi wada-jirah isugu yimaadda; xil ka qaadistiisana waxa soo jeedinaya Madaxweynaha, waxaana cod hal-dheeri ah ku oggolaanaya ama ku diidaya labada Gole (Guurtida iyo Wakiillada) oo fadhi wada-jira ah isugu yimaadda.
2. Guddoomiyaha Maxkamadda Sare Shuruudaha lagu magacaabayaa waxa loo raacayaa Qodobka 105aad farqadiisa 2aad ee Dastuurka.
3. Garsoorayaasha kale ee Maxkamada Sare waxaa magacaabistooda iyo Xilka qaadistooda leh Madaxwayanaha Jamhuuriyada Somaliland, ka dib marka uu la tashado Gudida Cadaalada.
4. Garsooraha Maxkamada Sare wuxuu xilkiisa ku waayayaa: -
   a) Markuu gudan kari waayo xilkiisa sababo caafimaad, ama karti xumi.
   b) Markuu iskii isaga casilo lagana aqbalo
   c) Markuu ku xad gudbo Dastuurka iyo xeerarka dalka u dejisan.

## Qoddobka 30aad
## Bannaanaanshaha Jagada Guddoomiyaha iyo Garsooraha Maxkamadda Sare

Jagada Guddoomiyaha ama GarsoorahaMaxkamadda Sare waxay ku bannaanaan kartaa, marka Guddoomiyaha ama garsooraha:

1. Ay geeriyi ku timaaddo;
2. Uu iskii isaga casilo xilka, Madaxweynuhuna ka aqbalo;

3. Xilka looga qaado qaab waafaqsan qodobka 29aad ee Xeerkan;
4. Uu xadhig ay Maxkamad awood u lihi kaga xukuntay dembi ciqaabeed uu kama-dambays noqdo.

**Qodobka 31aad**
**Qaab-dhismeedka Maxkamadda Sare**

1. Maxkamadda Sare, waxay ka kooban tahay:
   (b) Guddoomiyaha Maxkamadda Sare;
   (t) Guddoomiye-ku-xigeenka Maxkamadda Sare oo ah Garsooraha ugu darajada sarreeya garsooreyaasha Maxkamadda Sare,
   (j) Garsooreyaasha Maxkamadda Sare ee ka hawl- gala qaybaha garsoorka Maxkamadda Sare.
2. Maxkamadda Sare waxay leedahay Agaasin fulin oo hawshiisu tahay diyaarinta iyo maamulista miisaaniyadda iyo qorshe-sannadeedka Maxkamadda Sare iyo Maxkamadaha Hoose, iyo weliba maamulka shaqaalaha Maxkmadaha dalka.
3. Maxkamadda Sare waxay leedahay tirada shaqaalaha ah ee lagama maarmaanka u ah socodsiinta hawlaha Maxkamadda;
4. Maxkamadda Sare waxa ay yeelan kartaa La- taliyeyaal iyo khabiirro hadba intii loo baahdo oo uu magacaabistooda soo jeediyo Guddoomiyaha Maxkamadda Sare, Guddida Cadaaladduna ansixiso.

**Qodobka 32aad**
**Qaybaha Maxkamadda Sare**

Maxkamadda Sare waxay leedahay qaybahan hoos ku qoran:
1. Qaybta Dacwadaha Madaniga ah;
2. Qaybta Dacwadaha Ciqaabta ah;
3. Qaybta Dacwadaha Ciqaabta Caruurta;
4. Qaybta Dacwadaha Maamulka;
5. Qaybta Dawadaha Shaqada, Cashuuraha, Maaliyadda iyo Ganacsiga;
6. Qaybta Dacwadaha qoyska;
7. Qaybta Cilmi-Baadhista iyo Fasiraadda Shuruucda iyo xukunnada maxkamadaha ka soo baxa;
8. Waxay yeelanaysaa qaybaha kale ee loo baahdo.

**Qodobka 33aad**
**Fadhiyada Maxkamadda Sare**

1. Maxkamadda Sare waxay dacwadaha ku gashaa fadhi caadi ah oo ka kooban saddex garsoore oo midkood guddoomiye yahay; ama
2. Fadhi buuxa oo kakooban 5 (Shan) ama 7 (todoba) garsoore amaba ka badan oo midkood guddoomiye yahay.

**Qodobka 34aad**
**Awoodaha iyo Hab-raaca Dhegeysiga Dacwadaha Maxkamadda Sare**

1. Maxkamadd Sare waxay awood u leedahay dhegeysiga iyo ka-go'aan-gaadhidda:
   (b) Racfaannada laga soo qaato Maxkamadaha Racfaanka ee dalka;
   (t) Racfaannada xukunnada hal darajo ee dacwadaha shaqaalaha iyo dacwadaha doorashada goleyaasha degaanka;
   (j) Cabashooyinka laga keeno doorashooyinka guud (General Election) ee ku saabsan khaladaad ka dhacay doorashada Madaxtooyada ama doorashada goleyaasha Sharci-Dejinta ee musharrax ama xisbi ka soo dacwoodo;
   (x) khilaafyada ka dhex abuurma qaybaha garsoorka ee ku saabsan xagga awoodda dhegeysiga dacwadaha ee ikhtisaaska ama xagga xuduudda;
   (kh) Dacwadaha xisbi ama urur siyaasadeed dhexdiisa ka abuurma, ama xisbi iyo urur siyaasadeed u dhexaysa;
   (d) Cabashooyinka go'aammada maamulka ee kama-dambaysta ah laga keeno ee maamulka iyo dhinac isku hayaan ama dhinacyo danaynayaa isku hayaan;
   (r) Cabashooyinka urur siyaasadeed ka keeno go'aanka ansixinta xisbiyada siyaasadeed ama u-qalmid la'aan ka qayb-galka doorshada goleyaasha degaannada;
   (s) Dacwadaha la xidhiidha fasiraadda shuruucda iyo xukunnada Maxkamadeed ee kama- danbaysta ah;
   (sh) dacwadaha dib u eegista xukunnada madaniga iyo ciqaabta ee Maxkamada Sare.
2. Maxkamadda Sare waxay fadhi buuxa ku dhegeysataa dacwadaha:
   (b) go'aan-ka-gaadhidda cabashooyinka laga keeno doorashooyinka guud (General Elections) ee ku saabsan khaladaadka ka dhaca doorashooyinka Madaxtooyada iyo Goleyaasha Sharci dejinta;
   (t) Go'aan-ka-gaadhidda dacwadaha laga keeno go'aannada dhamaadka ah ee maamulka dawladda;
   (j) Dhegeysiga iyo go'aan-ka-gaadhida cabashooyinka laga keeno maxkamadaha gobollada ee ku saabsan kuraasida goleyaasha deegaannada;
   (x) Racfaannada laga soo qaato Qaybaha Dacwadaha Madaniga iyo Ciqaabta ee Tashiga ee Maxkamadaha Racfaanka;
   (kh) Dacwadaha dib-u-eegista xukunnada Maxkamadda Sare, iyo
   (d) Dacwad kasta oo uu Guddoomiyaha Maxkamadda Sare u arko in ay ku habboontahay in fadhi buuxa lagu dhegeysto.
3. Dhammaan dacwadaha kale, ee ka baxsan dacwadaha ku xusan faqradda 2 ee qodobkan, waxay Maxkamadda Sare ku dhegeysataa fadhi caadi ah oo ka kooban saddex garsoore oo midkood guddoomiye yahay.
4. Maxkamadda Sare dacwadaha ay heer bilaw ah ku dhegeysato, waxay dhegeysataa kana go'aan-gaadhaa xaqiiqooyinka dulucda (merit) iyo xeerka.
5. Dacwadahaay Maxkamadda Racfaanku dhegeysato, waxay Maxkamaddu dhegeysataa kana go'aan- gaadhaa muranka sharci oo keli ah.
6. Dacwadaha dib-u-eegista ah, waxay Maxkamadda Sare dhegeysigooda u raacdaa Xeerarka Habka Madaniga iyo Ciqaabta.

## Qodobka 35aad
## Awoodaha Guddoomiyaha Maxkamadda Sare

Guddomiyaha Maxkamadda Sare wuxuu leeyahay awoodahan soo socda:

1. Waa mas'uulka ugu sarreeya garsoorka dalka;
2. Wuxuu qaybiyaa dacwadaha soo gala Maxkamadda Sare;
3. Wuxuu guddoomiyaa dhegeysiga dacwadaha dib-u- eegista, iyo dacwadaha kale ee

aan dib-u-eegista lahayn, marka loo baahdo;
4. Wuxuu ka jawaabaa cabashooyinka iyo durista laga keeno garsooreyaasha Maxkamadda Sare, Guddoomiyeyaasha Maxkamadaha Racfaanka iyo Guddoomiyeyaasha Maxkamadaha Racfaanka iyo garsooreyaasha lala duro;
5. Wuxuu diyaariyaa qorshaha iyo miisaaniyad sannadeedka Maxkamadaha;
6. Wuxuu kormeeraa hawlaha garsoorka;
7. Wuxuu isku beddeli karaa kaaliyeyaasha iyo shaqaalaha Maxkamadaha dalka;
8. Wuxuu qoraa shaqaalaha Maxkamadaha dalka, isagoo la kaashanaya Hay'adda Shaqaalaha Dawladda, loona raacayo hab waafaqsan Xeerarka Shaqaalaha Dawladda;
9. Wuxuu mas'uul ka yahay habsami-u-socodsiinta hawsha Maxkamadda Sare;
10. Wuxuu kormeeraa xil-gudashada garsooreyaasha iyo hawl-wadeennada Maxkamadda Sare;
11. Wuxuu soo saaraa wareegtooyin garsoor, hageyaal iyo tilmaan-bixiyeyaal uu ku toosinayo hawlaha Maxkamadaha iyo habsami-u-dabbaqaadda xeerarka;
12. Wuxuu garsooreyaasha Maxkamadaha u magacaabaa dhegeysiga ama ka-qayb-galka dhegeysiga dacwad ka socota Maxkamad kale, marka ay lama huraan noqoto, isagoo tixgelinaya darajada garsooraha;
13. Wuxuu warbixin sannadeedka Waaxda garsoorka u gudbiyaa Gudidda Cadaaladda, waxa kale oo uu siinayaa warbixinada ay ka soo dalbadaan Gudiyada goleyaasha Xeer-dejinta u qaabilsan arrimaha garsoorka;
14. Wuxuu horumarinta hay'adaha garsoorka la kaashadaa Wasiirka oo Golaha Wasiirrada ku metela hay'adaha bahda cadaaladda;
15. Wuxuu siiyaa garsooreyaasha Makamadaha Hoose, Guddoomiyeyaasha Maxkamadaha Racfaanka iyo garsooreyaasha Maxkamadda Sare fasax-dhan ugu badnaan 30(soddon) cisho;
16. Wuxuu gutaa hawlaha kale ee ay awood u siiyaan Dastuurka, Xeerkan, xeerar kale ee dalka ee khuseeya garsoorka iyo Xeer-nidaamiyeyaasha ka dheegma Xeerka iyo xeerarkaa kale.

## Qodobka 36aad
## Maxkamadda Dastuurka

1. Maxkamadda Dastuurku waxay abuurantaa ka dib marka ay Guddoomiyaha Maxkamadda Sare soo gaadho dacwad dastuuri ahi.
2. Maxkamadda Dastuurku waxay ka kooban tahay Guddoomiyaha Maxkamadda Sare iyo dhammaan garsooreyaasha Maxkamadda Sare, waxaanay dacwadaha ku gashaa Guddoomiyaha Maxakamadda Sare iyo dhammaan Garsooreyaasha Maxkamadda Sare.
3. Xarunta Maxkamadda Dastuurku waa xarunta Maxkamadda Sare.
4. Kaaliyaha Sare ee Maxkamadda Sare ayaa ah kaaliyaha Maxkamadda Dastuurka.

## Qodobka 37aad
## Awoodaha Maxkamadda Dastuurka

Maxkamadda Dastuurku waxay awood u leedahay:
1. Dhegeysiga murannada ku saabsan waafaqsanaan- la'aanta Dastuurka eexeer dhaqan-galay ama qodob xeer oo dhaqan-gal ah, amaba fal xukuumadeed;
2. Macnaynta iyo fasiraadda Dastuurka iyo xeerarka kale ee dalka, marka laysku

qabto nuxurka ujeeddadooda ama ay muuqato is khilaafsanaantoodu;
3. Fasiraadda iyo tirtiridda xukunnada garsoorka ee dhaqan-galay ee khilaafsan Dastuurka, Shareecada Islaamka ama xeerarka dalka;

## Qodobka 38aad
## Habka Loo Soo Jeedin Karo Dacwad Dastuuri ah

1. Dacwad Dastuuri ah waxaa lagu soo jeedin karaa codsi ay cid danaynaysaa u keento Guddoomiyaha Maxkamadda Sare oo ah Guddoomiyaha Maxkamadda Dastuurka.
2. Cid kasta oo tirsata in xaq dastuuri ah oo ay leedahay lagaga qaaday xeer, go'aan ama fal cidi fulisy, waxay Maxkamadda Dastuurka u qoran kartaa arji sababaysan oo ay ku caddaysay xaqa dastuuriga ah ee laga qaaday iyo xeerka, go'aanka ama falka lagaga qaaday, cidda go'aanka soo saartay ama falka amartay ama fulisay iyo caddaymaha la xidhiidha.
3. Dacwadda Dastuuriga ah ee xukuumaddu ay dhinac ka tahay, waxa xukuumadda uga wakiil ah Garyaqaanka Guud ee dawladda.
4. Sida ku xusan Dasatuurka Qodobkiisa 77aad(4) Mashruuc-sharci ay labada Gole ee Baarlamaanku ku wada ansixiyeen ama ku wada oggolaadeen aqlabiyadda 2/3 (Saddex meelood, laba) ama ka badan Madaxweynuhu dib uma celin karo ee wuu saxeexayaa. Haddii uu arko in mashruuc-sharcigaasi ka hor imanayo qodob ama qodobo Dastuurka, waa inuu sidaa ku wargeliyaa Shir-guddoonka iyo Xeer- ilaaliyaha Guud oo u gudbin doona Maxkamadda Dastuuriga ah.
5. Dacwadda dastuuriga ah ee ay Maxkamadda Dastuurku dhegeysan karto waxa ay noqon kartaa:
   (b) Cabasho la xidhiidha go'aan ka soo baxay hay'ad Fulineed ama Gole Sharci-dejineed, hay'ad aan ahayn tu dawleedama xukun maxkamdeed oo khilaafsan Dastuurka;
   (t) Muran ku saabsan micnaha qodob Dastuur;
   (j) Khilaaf ku saabsan waafaqsanaan-la'aanta Dastuuurka ee xeer ka soo baxay Sharci- dejinta ama xeer dhaqan-gal aha oo cidda danaynaysa xaq seejinaya;
   (x) Khilaaf ku saabsan ku-xadgudub xuquuqaha aasaasiga ah ee Dastuurka ku xusan;
   (kh) Khilaaf ku saabsan ku-dhaqmid-la'aan qodob Dastuur;
6. Guddoomiyaha Maxkamadda Sare, ahna Guddoomiyaha Maxkamadda Dastuurku marka uu qabto codsi furitaan dacwad dastuuri ah oo sababaysan, wuxuu u magacaabayaa Guddi saddex garsoore ka kooban, kuwaas oo daraasad iyo lafagur ku sameeya codsiga dacwadda dastuuriga ah, iyagoo daraasaddooda ku soo celinaya Guddoomiyaha Maxkamadda.
7. Haddii daraasadda ku xusan faqradda 6aad ee qodobkan ay tilmaanto jiritaan muran dastuuri ah, Guddoomiyaha Maxkamaddu wuxuu amrayaa in la furo dacwad dastuuri ah, haddii se daraasaddu si aan mugdi ku jirin u muujiso in aan dacwadu la xidhiidhin khilaaf DastuurGuddoomiyuhu wuu diidayaa furista dacwaddaa.
8. Haddii Maxkamaddu furto dacwad dastuuri ah, waxay u yeedheysaa si ay uga soo jawaabto dhinaca ama dhinacyada kale ee dacwaddu khusayso.
9. Haddii Maxkamadda ay u muuqan waydo cid ka soo jeedda dhinaca kale oo danaynaysa arrinka, waxay ku faafinaysaa dacwadda faafinta rasmiga ah, si ay uga soo qayb galaan cid kasta oo danaynaysadhinac-ka- noqoshada dacwaddaa dastuuriga ah xilliga Maxkamaddu u ciyintay dhegeysigeeda, iyadoo haddii la waayo xilligaas cid ka soo jeedda dhinaca kale ay Maxkamaddu fadhi furan ku dhegeysaneyso dacwadda,

go'aanna kaga soo saarayso.

## Qodobka 39aad
## Qaab-Shaqeedka Maxkamadda Dastuurka

1. Maxkamadda Dastuurku marka ay go'aaminayso waafaqsanaan-la'aanta Dastuurka, waxay ahmiyadda siinaysaa dhinaca qaabka iyo nuxurka ee xeerarka ama qodobbada xeer ee muranku ka taagan tahay, iyo waafaqsanaantooda ama waafaqsanaan-la'aantooda qodobbada Dasuurka, iyadoo aan wax tixgelin ah la siinayn farogelin siyaasadeed ama sheegasho awood sharci-dejin oo la adeegsado;
2. Maxkamadda Dastuurku waxay si ku-meel-gaadh ah u laalaysaa ku-dhaqanka xeerka ama qodobka xeer ee laga soo cawday khilaafsanaantiisa Dastuurka, falka xukuumadeed ee dastuurinimadiisa la duray ama sii- socoshada dacwadda laga soo dhex jeediyey khilaafsanaanteeda Dastuurka, ilaa inta ay Maxkamaddu ka soo saareyso go'aan kama-dambeys ah.
3. Maxkamadda Dastuurka waxa waajib ku ah inay si madax-bannaan u raadsato caddaymo iyo Cilmi- Baadhis la xidhiidha cabashada hor taal.
4. Maxkamadda Dastuurku waxay ku caddaysaa xukunnadeeda asbaabaha iyo caddaymaha ay u cuskatey xukunnadeeda.
5. Maxkamadda Dastuurku waxay xukunnadeeda soo saartaa, ka dib markay dhegeysato daristana caddaymaha ay u soo gudbiyeen dhinacyada is hayaa ama cidda danaynaysaa.
6. Maxkamadda Dastuurku waxay dhegeysiga dacwadaha u raacdaa Xeerka Habka Madaniga inta kaga dabbaqmi karta.
7. Xukunnada Maxkamadda Dastuurku waa kama- dambays, waxaana la gaadhsiiyaa dhinacyada ay khuseeyaan, labada Gole ee Sharci-dejinta (Guurtida iyo Wakiillada) iyo xukuumadda, isla markaana waxa lagu soo saaraa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.
8. Guddoomiyaha iyo garsooreyaasha Maxkamadda Dastuurka lama duri karo, haddaanay si toos ah dhinac uga ahayn cabashada markaa Maxkamadda hortaal.

## Qodobka 40aad
## Maxkamadda Sare ee Cadaaladda

1. Maxkamadda Sare ee Cadaaladda (High Court of Justice) waxay ka kooban tahay Guddoomiyaha Maxkamadda Sare, afar garsoore oo ka tirsan Maxkamadda Sare iyo afar xubnood oo ka tirsan goleyaasha Sharci-dejinta oo gole waliba soo xulanayo laba xubnood.
2. Gole Sharci-dejineed markuu soo xulayo labada xubnood ee ka mid noqonaya Maxkamadda Sare ee Cadaaladda, waxa mid-mid u soo jeedinaya Shir- Guddoonka golahaa, waxaana cod kala badh iyo hal ah ku oggolaanaya ama ku diidaya golaha soo xulanaya.
3. Xubinta gole u codeeyey ee golahaa ka heli weyda cod oggolaansho ah oo ugu yaraan ah kala badh iyo hal tirada xubnaha golahaa, waxa Shir-Guddoonku ku soo beddelayaa, golahana hor-keenayaa xubin kale si loogu codeeyo.

## Qodobka 41aad
## Awoodaha iyo Habka Dacwad-Qaadista

## Maxkamadda Sare ee Cadaaladda

1. Maxkamadda Sare ee Cadaaladdu waxay dhegeysataa, kadib marka dhawrsanaanta laga xayuubiyo, go'aanna ka gaadhaa dacwadaha ciqaabta ah ee lagu soo oogo xubnaha labada gole ee Sharci-dejinta iyo xubnaha Golaha Wasiirrada.
2. Maxkamadda Sare ee Cadaaladdu waxay dhegaysiga dacwadaha u raacdaa Xeerka Habka Ciqaabta intii uga suurto-gal ah.
3. Go'aammada Maxkamadda Sare ee Cadaaladdu waa inay ku caddaato qodobbada, asbaabaha iyo caddaymaha ay Maxkamaddu u cuskatay go'aammadeeda.
4. Xubinta la eedeeyay waxay xaq u leedahay inay qabsato qareen ama qareeno difaaca.
5. Eedaynta xubinta ka midka labada gole sharci- dejineed ama golaha Wasiirrada, waxa Maxkamadda ka hor-oogaya Xeer Ilaaliyaha Guud ee qaranka ka dib marka xubinta laga xayuubiyo dhawrsanaanta.
6. Dacwadaha Maxkamadda Sare ee Cadaaladda waxaa kaaliye ka ah Kaaliye ka tirsan Maxkamadda Sare oo uu magacaabo Guddoomiyaha Maxkamadda Sare.
7. Garsooreyaasha Maxkamadda Sare ee Cadaaladda waxaa loo duri karaa si waafaqsan qodobka 10aad ee Xeerka Habka Ciqaabta.
8. Marka Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee Cadaaladduku qanco inay jiraan asbaabaha duristu, waxaa xubinta la duray soo beddelaysa cidii marka hore magacawday.
9. Maxakamadda Sare ee Cadaaladdu waxay fadhiyadeeda ku qabsataa Xarunta Maxkamadda Sare, awooddeeda iyo jiritaankeeduna wuxuu ku eeg yahay marka dacwadda loo magacaabay ay go'aan ka gaadho.
10. Xukunka Maxkamadda Sare ee Cadaaladda waxa la gaadhsiiyaa dhinacyada ay khusayso, labada Gole ee Sharci-dejinta (Guurtida iyo Wakiillada) iyo xukumadda, isla markaana waxa lagu soo saaraa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.
11. Xukunka Maxkamadda Sare ee Cadaaladda waxa looga caban karaa in ay dib-u-eegis ku samayso isla Maxkamadda Sare ee Cadaaladda, iyadoo la raacayo Xeerka Habka Ciqaabta ee tilmaamaya shuruudaha dib-u-eegista.
12. Haddii ay Maxkamadda Sare ee Cadaaladdu ku qanacdo codsiga dib-u-eegista dacwadda, waxay dib- u-eegista dacwadda u qabaneysaa fadhi gaar ah.
13. Garsooreyaasha fadhiga dib-u-eegista ee Maxkamadda Sare ee Cadaaladdu waxay noqonayaan afar Garsoore oo cusub, oo uu Guddoomiyuhu magacaabo, iyo afartii xubnood ee hore ee Goleyaasha Sharci-dejintu soo magacaabeen, waxaana Guddoominaya fadhigaasi Guddoomiyaha Maxkamadda Sare.
14. Maxkamadda Sare ee Cadaaladdu waxay fadhiga dib- u-eegista u raacdaa tallaabooyinka dib-u-eegista ee uu dhigaayo Xeerka Habka Ciqaabtu, go'aanka ay dib-u-eegista ka soo saartaana wuxuu noqonayaa kama- dambays.

## QAYBTA SADDEXAAD
## XEER-ILAALINTA GUUD

### Qodobka 42aad
### Heerarka Xafiiska Xeer-Ilaalinta Guud

Xafiiska Xeer-Ilaalinta Guud wuxuu ka kooban yahay heerarkan hoos ku qoran:

1. Xafiiska Xeer-Ilaalinta Guud ee Qaranka,
2. Xafiisyada Xeer-Ilaalinta Guud ee Gobollada,

3. Xafiisyada Xeer-Ilaalinta Guud ee Degmooyinka.

## Qodobka 43aad
## Xilka iyo Waajibaadka Xafiiska Xeer-Ilaalinta Guud

1. Xafiiska Xeer-Ilaalinta Guud wuxuu oogaa kana qayb- galaa dacwadaha ciqaabta ah, isagoo qaranka matalaya.
2. Xafiiska Xeer-Ilaalinta Guud wuxuu danta caamka ah awgeed ka qayb-galaa dacwadaha madaniga ah ee ka- qayb-galkooda Xeerka Habka Madanigu tilmaamayo.
3. Xafiiska Xeer-Ilaalinta Guud wuxuu amraa baadhista dacwadaha ciqaabta ah, isagoo adeegsanaya Boliiska qaranka iyo Hay'adaha kale ee baadhista.
4. Xafiiska Xeer-Ilaalinta Guud wuxuu kormeeraa, ilaaliyaana xaaladda nololeed, caafimaad iyo nadaafadeed ee xabsiyada dalka, saldhigyada iyo meelaha kale ee dadka lagu xidho, waxaanu hubiyaa in la waafajiyay Xeerka Xabsiyada iyo xeerarka kale ee khuseeya.
5. Xafiiska Xeer-Ilaalinta Guud wuxuu Maxkamadda Sare ee Cadaaladda dacwadaha kaga hor-oogaa xubnaha goleyaasha Sharci-dejinta iyo Golaha Wasiirrada ee dacwado ciqaabeed lagu soo eedeeyo, ka dib marka dhawrsanaanta laga xayuubiyo.
6. Xafiiska Xeer-Ilaalinta Guud wuxuu hagaa baadhista dacwadaha ciqaabta ee booliisku baadhistooda gacanta ku hayo.
7. Xafiiska Xeer-Ilaalinta Guud wuxuu dhawraa, ilaaliyaana ku-dhaqanka shuruucda dalka.
8. Xafiiska Xeer-Ilaalinta Guud wuxuu diiwaan-geliyaa xeerarka aasaasidda ururrada, shirkadaha iyo diiwaan gelin kasta oo uu xeer awood u siiyo.
9. Xafiiska Xeer-Ilaalinta Guud wuxuu ka qayb-galaa fulinta xukunnada dilka ah si waafaqsan Xeerka Habka Ciqaabta.
10. Xafiiska Xeer-Ilaalinta Guud wuxuu diyaariyaa warbixino iyo talooyin la xidhiidha dembiyada iyo ka- hortaggooda, waxaanu u gudbiyaa Madaxweynaha isagoo nuqullo ka siinaya Wasiirka iyo Guddiyada labada gole ee Sharci-dejinta u qaabilsan garsoorka.
11. Xafiiska Xeer-Ilaalinta Guud wuxuu talo ka bixiyaa cafisyada guud iyo kuwa gaarka ah.
12. Xafiiska Xeer-Ilaalinta Guud wuxuu gutaa hawlaha kale ee xeer u xilsaaray.

## Qodobka 44aad
## Qaab-Dhismeedka Xafiiska Xeer-Ilaalinta Guud

1. Xafiiska Xeer-Ilaalinta Guud waxa uu yeelan karaa waaxaha hoos ku qoran:
   (b) Waaxda Dacwadaha Ciqaabta, Dacwadaha Madaniga iyo Dacwadaha Dastuurka;
   (t) Waaxda Sharciyada, Diyaarinta Shuruucda iyo Diiwaan-Gelinta;
   (j) Waaxda Maamulka iyo Lacagta;
   (x) Waaxda Kormeerka Xabsiyadda, iyo
   (kh) Waaxda Macluumaadka iyo Xogta Dembiyada.
2. Waaxaha Xafiiska Xeer-Ilaalinta Guud waxa hoos-iman kara Qaybo intii loo baahdo.
3. Waax kasta oo ka midah Xafiiska Dhexe ee Xeer- Ilaalinta Guud waxaa madax ka ah Ku-Xigeen Xeer- Ilaaliye Guud.
4. Xafiiska Xeer-Ilaalinta Gobolku wuxuu ka kooban yahay Ku-xigeen Xeer-Ilaaliye Guud, oo ah Madaxa Xafiiska Xeer-Ilaalinta ee Gobolka, Ku-Xigeenno kale oo hoos yimaadda Madaxa Xafiiska Xeer-Ilaalinta ee Gobolka iyo Doodeyaal (dacwad oogeyaal) iyo hawl- wadeenno kale intii loo baahdo.

5. Xafiiska Xeer-Ilaalinta ee Degmadu wuxuu ka kooban yahay Ku-Xigeen Xeer-Ilaaliye ama doode ah Madaxa Xafiiska Xeer-Ilaalinta ee Degmada, doodeyaal hoos yimaadda Madaxa Xafiiska Xeer-Ilaalinta ee Degmada iyo hawl-wadeenno kale intii loo baahdo.
6. Degmooyinka aanay joogin Ku-Xigeenno Xeer-Ilaaliye Guud iyo doodeyaal, waxaa hawshooda qabanaya sarkaalka Booliiska Degmada ugu darajada sarreeya.
7. Marka laga reebo inta Xeerkan ama xeer kale lagu sheegay, qaab-dhismeedka Xafiisyada Xeer-Ilaalinta Guud, Xafiisyada Xeer-Ilaalinta ee heer Qaran, Xafiisyada Xeer-Ilaalinta ee heer Gobol iyo heer Degmo, xilalka, waajibaadka iyo awoodaha Waaxyaha, xafiisyada iyo masuuliyiinta Xeer-Ilaalinta iyo qaabka xil-gudashadooda, hab-raaca shaqaalaynta iyo arrimaha kale ee aan Xeerkan ama xeer kale lagu sheegin, waxaa lagu nidaaminayaa Xeer-nidaamiye uu diyaariyo Xeer-Ilaaliyaha Guud Guddida Cadaaladduna ansixiso.

## <u>Qodobka 45aad</u>
## <u>Awoodaha Xeer-Ilaaliyaha Guud</u>

Xeer-Ilaaliyaha Guud wuxuu leeyahay awoodahan hoos ku qoran:

1. Wuxuu metalaa Xeer-Ilaalinta Guud ee Qaranka;
2. Wuxuu hoggaamiyaa Xafiisyada Xeer-Ilaalinta Guud;
3. Wuxuu meeleeyaa, maamulaana ku-xigennada Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Xarunta Xeer-Ilaalinta Guud;
4. Wuxuu diyaariyaa qorshe-hawleedka iyo miisaaniyad-sannadeedka Xeer-Ilaalinta Guud, islamarkaana maamulaa, oo dabo-galaaa fulinteeda, kadib marka uu ansixiyo Golaha Wakiilladu;
5. Wuxuu Madaxweynaha iyo guddiyada labada gole ee Sharci-dejinta u qaabilsan arrimaha garsoorka siiyaa warbixin-sannadeed katurjumaysa tirada kiisaska sannadka dhacay ee ay dacwadahooda galeen maxkamaduhu, noocyada dembiyada sannadkaa dhacay, iyadoo warbixnta lagu caddaynayo dembiyada sannadkaa kordhay iyo kuwa hoos u dhacay, xukunnada kama- dambaysta noqday iyo kuwa aan weli kama- dambays noqon, iyo wax-qabadka kale ee Xeer- Ilaalinta;
6. Wuxuu dejiyaa oo meel-mariyaaa qorsheyaal xaqiijin kara in ay dadweynuhu fahmaan doorka ay Xeer-Ilaalinta Guud ku leedahay ilaalinta Dastuurka, xeerarka dalka, xuquuqaha iyo xorriyadaha aasaaasiga ah ee Bani Aadamka;
7. Wuxuu horseedaa in Ku-Xigeennada Xeer- Ilaaliyeyaha Guud, doodeyaasha iyo shaqaalaha Xafiiska Xeer-Ilaalintu ay helaan tababarro joogto ah si kor loogu qaado xil-gudashadooda;
8. Wuxuu usoo jeediyaa Guddida Cadaaladda shaqo- qoridda Ku-Xigeennada Xeer-Ilaaliyaha Guud, doodeyaasha (dacwad oogeyaasha/xeer ilaaliyeyaasha ka hawlgala Xeer Ilalinta Guud iyo Gobollada iyo Degmooyinka) si ay u ansixiyaan;
9. Wuxuu si sharciga waafaqsan u shaqaaleeyaa oo uu u maamulaa shaqaale-hoosaadka ay Xeer- Ilaalintu u baahan tahay;
10. Wuxuu fuliyaa waajibaadyada kale ee Xeerkan ama xeerar kale ay u xilsaaraan.

## <u>Qodobka 46aad</u>
## <u>Xubnaha Xafiiska Xeer-Ilaalinta Guud</u>

Xubnaha Xafiiska Xeer-Ilaalinta Guud waxa ay ka kooban yihiin:

1. Xeer-Ilaaliyaha Guud;

2. Ku-Xigeennada Xeer-Ilaaliyaha Guud, iyadoo Ku-Xigeenka ugu darajada sarreeyaa uu yahay Ku- Xigeenka Kowaad ee Xeer-Ilaaliyaha Guud;
3. Madaxa ku-xigeenada Xeer-ilaalinta Guud ee Gobolada Dalka
4. Dacwad Oogeyaasha (prosecutors);
5. Shaqaalaha kale, hadba intii loo baahdo.

## Qodobka 47aad
## Awoodaha Dacwad-Oogiseed ee Xubnaha Xafiiska Xeer-Ilaalinta Guud

1. Xeer-Ilaaliyaha Guud iyo Ku-Xigeennada Xeer- Ilaaliyaha Guud waxay ka qayb-geli karaan dacwadaha dhammaan darajooyinka maxakamadaha.
2. Dacwad-oogeyaashu (prosecutors) waxay ka qayb-geli karaan dacwadaha maxkamadaha darajada koowaad.

## Qodobka 48aad
## Shuruudaha Qofka Noqonaya Dacwad-Ooge (prosecutor).

Qofka noqonaya Dacwad-Ooge waa in uu buuxiyo shuruudahan hoos ku qoran:

1. Waa in uu u dhashay Somaliland, da’diisuna ka yarayn 25 jir;
2. Waa in uu shahaado xagga sharciga ahka haysto Jaamacad la aqoonsanyahay, ama ka soo baxay kulliyad dembi-baadhiseed oo la aqoonsanyahay, ama ku soo shaqeeyay dembi baadhe muddo 5 (shan) sano ah ugu yaraan, yahayna qof aqoon fiican u leh xirfadda dembi-baadhista iyo xeerarka dalka;
3. Waa in uu yahay qof maskax ahaan caafimaad qaba, kuna sifoobey akhlaaq-wanaag.

## Qodobka 49aad
## Shuruudaha Lagu Magacaabi Karo Xeer-Ilaaliyaha Guud

Qofka loo magacaabayo Xeer-Ilaaliye Guud waa in uu buuxiyo shuruudahan:

1. Waa in uu u dhashay Somaliland;
2. Waa in aanay da’diisu ka yarayn 40 sano;
3. Waa in uu shahaado xaga sharciga ah ka haysto Jaamacad la aqoonsan yahay, ama shahaado ka haysto kulliyad dembi-baadhiseed oo la aqoonsan yahay;
4. Waa in uu isugeyn ugu yaraan 10 (toban) sano, ku soo shaqeeyey garsoore, ku-xigeen Xeer-Ilaaliye Guud, qareen, sarkaal sare oo Booliis ah ama sarkaalsare oo hay’adaha dembi-baadhista ah;
5. Waa in aanu ku dhicin xukun ciqaabeed oo kama- dambays ah oo xadhiggiisu ka badan yahay 3 (saddex) sano;
6. Waa in uu yahay qof maskax ahaan caafimaad qaba.
7. Waa in uu ku sifoobey akhlaaq-wanaag, leeyahayna sumcad wanaagsan.

## Qodobka 50aad
## Magacaabista iyo Xil-ka-Qaadista Xeer-Ilaaliyaha Guud.

1. Magacaabista Xeer-Ilaaliyaha Guud waxaa soo jeedinaya Madaxweynaha,

waxaana magacaabistiisa cod hal dheeri ah ku ansixinaya Golaha Wakiillada sida uu dhigayo Qodobka 114aad ee Dastuurku.
2. Xeer-Ilaaliyaha Guud waxa xilka ka qaadi kara Madaxweynaha si waafaqsan Qodobka 114aad(2) Ee Dastuurka Jsl.
3. Xeer-Ilaaliyaha Guud wuxuu xilka ku waayi karaa sababo la mid ah kuwa garsooraha Maxakamada Sare xilka ku waayikaro.

## Qodobka 51aad
## Bannaanaanshaha Jagada Xeer-Ilaaliyaha Guud

Jagada Xeer-Ilaaliyaha Guud waxay ku bannaanaan kartaa, marka Xeer-Ilaaliayaha Guud:
(1) Ay geeriyi ku timaaddo;
(2) Uu iskii isaga casilo xilka, Madaxweynuhuna ka aqbalo;
(3) Xilka looga qaado qaab waafaqsan qodobka 51aad ee Xeerkan.

## QAYBTA AFRAAD GUDDIDA CADAALADDA

## Qodobka 52aad
## Dhismaha Guddida Cadaaladda

1. Guddida Cadaaladdu waa hay'adda ugu sarraysa hoggaaminta maamulka garsoorka, waxaanayka kooban tahay: -
b) Guddomiyaha Maxkamadda Sare……………………………..…Guddomiyaha Guddida;
t) Labada garsoore ee Maxkamadda Sare
ee darajo ahaan ku xiga Guddoomiyaha………………………………………………….Xubno
(j) Xeer-Ilaaliyaha Guud..........................................................................................................Xubin
(x) Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Cadaaladda....................................................xubin
(kh) Guddoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha Dawladda..................................................xubin
(d) Laba xubnood oo Golaha Wakiilladu labadii sannadood mar ka soo doorto dadweynaha kana kalatirsan aqoon-yahannada iyo ganacsatada..........................xubno
(r)Laba xubnood oo Golaha Guurtidu labadii sanadoodba mar ka soo doorto dadweynaha kana kala tirsan dhaqan-yaqaannada iyo Culimada Diinta.............xubno
2. Marka uu Guddoomiyuhu maqan yahay, garsooraha ka tirsan Guddida ee darajo ahaan ku soo xiga Guddoomiyaha ayaa sii wadaya hawsha Guddoomiyaha.
3. Kaaliyaha Sare ee Maxkamadda Sare ayaa, isagoo aan cod lahayn, ah Xoghayaha Guddida.
4. Guddida Cadaaladdu waxay leedahay xafiis maamul oo u gaar ah oo ay hoos-timaaddo Waax hawsheedu tahay Kormeerka iyo Baadhista Garsoorka.

## Qodobka 53aad
## Xilka iyo Waajibaadyada Guddida Cadaaladda

Guddida Caddaaladdu waxa ay leedahay awoodaha iyo waajibaadyada hoos ku qoran:
1. Magacaabista, dallacsiinta, hoos-u-dhigidda, beddelaadda, anshax-marinta iyo xil-ka-qaadista garsooreyaasha Maxkamadaha Hoose, iyo ku- Xigeennada Xeer-Ilaaliyaha Guud;
2. Ilaalinta xushmadda iyo dhawrsanaanta garsooreyaasha Maxkamadaha Hoose iyo

Ku- Xigeennada Xeer-ilaaliyaha Guud;

3. Fayl-u-furidda garsooreyaasha iyo ku-xigeennada Xeer-Ilaaliyaha Guud, iyo ku-kaydinta faylashaa dhammaan arrimaha khuseeya garsooreyaasha iyo ku-xigeennada Xeer-Ilaaliyaha Guud, sida dallacaadaha, hoos-u-dhigidda, fasaxyada, digniinaha, abaal-marinnada iwm;
4. Kormeeridda iyo daraasadaynta arrimaha garsoorka ugu yaraan hal mar sannadkii;
5. Maamuus-ka-xayuubinta garsoore ama ku-xigeen Xeer-Ilaaliye Guud, haddii lagu soo oogo dembi ciqaabeed oo Guddidu garawsatay;
6. U-gudbinta Shirweynaha Garsoorka war-bixin sannadeed qoraal ah, oo faahfaahsan oo ku saabsan xil-gudashada garsoorka;
7. Soo-saaridda xeer-hoosaadyada iyo hab-raacyada shaqo-gudasho iyo maamul ee Guddida;
8. Soo-saaridda iyo dhaqan-gelinta Xeer-hoosaadyo khuseeya magacaabista, mushaharka, gunnooyinka, tabobarrada, beddelka, shaqo- gudashada iyo anshaxa iyo asluubta garsoorka;
9. Kala-talinta Madaxweynaha magacaabista Guddoomiyaha iyo garsooreyaasha Maxkamadda Sare;
10. Diyaarinta, dhaqaale-u-raadinta, daba-galka iyo fulinta barnaamijyada iyo qorsheyaasha horumarinta iyo tayaynta garsoorka;
11. Diyaarinta, soo-jeedinta, raadinta iyo daba-galka baahiyaha garsoorka;
12. Ilaalinta, raadinta iyo difaacidda madax-bannaanida, karaamada iyo xuquuqaha garsoorka;
13. Soo-saaridda xeer-nidaamiyeyaal, hab-raacyo, hageyaal, tilmaan-bixiyeyaal iyo wareegtooyin la xidhiidha hawl-gudashada garsoorka;
14. Diyaarinta qorsheyaasha dalka loogu baahinayo garsoorka;
15. Qiimaynta iyo la-xisaabtanka garsooreyaasha Maxkamadaha Hoose iyo ku-xigeennada Xeer- Ilaaliyaha Guud;
16. U-hawl-gelidda aqoon-korodhsiyo iyo tababarro ay helaan hawl-wadeennada garsoorku;
17. Fasax-siinrta garsoorayaasha maxkamadaha Hoose, Gudoomiyeyaasha Maxkamadaha Racfaanka iyo garsoorayaasha Maxkamadda Sare Mudo dhan 31 (kaw iyo soddon) cisho iyo wixii ka badan;
18. Gudashada waajibaadyada kale ee uu Xeerkan ama xeer kale u xil-saaro.

## Qodobka 54aad
## Xilka iyo Waajibaadka Guddoomiyaha Guddida Cadaaladda

Guddoomiyaha Guddidu Cadaaladdu waxa uu leeyahay xilka iyo waajibaadyadan soo socoda:

1. Wuxuu guddoomiyaa fadhiyada Guddida marka kooramku u buuxsamo;
2. Wuxuu diyaariyaa ajandaha fadhiga soona hor-dhigaa Guddida;
3. Wuxuu isugu yeedhaa fadhiyada Guddida;
4. Wuxuu diyaariyaa qoraallada iyo go’aammada Guddida;
5. Wuxuu Wasaaradda u gudbiyaa go’aammada maamul ee Guddida;
6. Wuxuu Guddida war-bixinka siiyaa wixii ka fulay go’aammaddii hore ee Guddida iyo wixii aan ka fulin, iyo sababaha ay u fuli waayeen, iyo go’aamada uu ku- meel-

gaadh ahaan u sii qaatay muddadii u dhaxeysey labada shire e Guddida;

7. Wuxuu hoggaamiyaa shirkarka Guddida;
8. Wuxuu diyaariyaa safarrada Guddida;
9. Wuxuu diyaariyaa miisaaniyadda Guddida soona hordhigaa Guddida si ay u ansixiso;
10. Wuxuu hawl-geliyaa, kormeeraana xoghaynta Guddida iyo hawl-wadeennada xafiiska maamulka Guddida;
11. Wuxuu ka dalbadaa Shir-Guddoonnada labada Gole ee Sharci-dejinta in ay soo magacaabaan xubnaha Guddida Cadaaladda ee ay magacaabistooda leeyihiin, marka xubnaha hore muddo-xileekoodu dhamaado;
12. Marka ay baahi deg-deg ahi jirto, wuxuu si ku-meel-gaadh ah garsoore ugu meeleeyaa jago u dhiganta ama ka sarraysa jagada uu markaasi hayo, ilaa laga gaadhayo shirka ugu soo horreeya ee Guddida;
13. Waxa kale oo uu fuliyaa hawlaha kale ee Xeerkani u xil-saaro ama Guddidu u igmato.

## Qodobka 55aad
## Waajibaadka Xoghayaha Guddida Cadaaladda

Xoghayaha Guddida Cadaaladdu wuxuu leeyahay waajibaadyadan hoos ku qoran:

1. Qoridda iyo xafidaadda hadal-qoraalka kulammada Guddida iyo dhammaan qoraallada kale iyo dhakumentiyada Guddida;
2. Diyaarinta ajendaha kulammada Guddida, isagoo kala tashanaya Guddoomiyaha iyo ku-wargelinta xubnaha Guddida xilliyada kulammada Guddida;
3. Fulinta hawlaha kale ee ay u xil-saaraan Guddoomiyaha iyo Guddidu

## Qodobka 56aad
## Kulammada Guddida Cadaaladda

1. Guddida Cadaaladdu waxay yeelataa kulammo caadi ah, waxaanay yeelan kartaa kulammo aan caadi ahayn marka ay u baahato.
2. Guddidu waxay yeelataa kulan caadi ah bishii hal mar.
3. Kulanka aan caadiga ahayn ee Guddida waxa isugu yeedhaya Guddoomiyaha, ka dib markuu iskii u garto baahida ah in Guddidu kulan isugu timaaddo, ama uu qoraal sababaysan oo ay kulanka Guddida ku dalbanayaa ka helo ugu yaraan kal badh xubnaha Guddida.
4. Kulammada Guddidu waxay ku furmi karaan marka ay joogaan saddex-meelood oo laba tirada guud ee xubnaha Guddidu.
5. Xubinta Guddida ah ee dalka debeddiisa ku maqan, ama caafimaad-darro ay u jiifto muddo bil ka badan awgeed uga soo qayb-geli weyda kulammada Guddida, saamayn ku yeelan mayso xisaabinta kooramka kulanka Guddidu ku qabsoomi karo.
6. Go'aammada Guddidu waxay ku ansaxayaan cod hal dheeri ah.
7. Guddoomiyaha Guddidu ma codeeyo, haddii aanay laba arrimood oo loo kala codeeyey codadka ay kala helaan is-leekaanin, markaas oo guddoonku noqonayo dhinaca uu Guddoomiyuhu u codeeyo.
8. Xubnaha Guddida Cadaaladdu waxay fadhiyada Guddida ku qaadanayaan gunno-hawleed.

## Qodobka 57aad
## Hab-Raaca soo Xulashada Xubnaha Guddida Cadaaladda ee Goleyaasha Sharci-Dejinta

1. Marka ay muddo 2 (laba) bilood ahika hadhsan tahay dhammaadka muddo-xileedka xubnaha Guddida Cadaaladda ee labada Gole ee Sharci-dejintu soo magacaabeen, Guddoomiyaha Guddiga Cadaaladu wuxuu Shir-Gudoonnada labada gole ee Sharci-dejinta u qorayaa qoraal uu kaga dalbanayo in gole waliba soo magacaabo labadii xubnood ee beddeli lahaa xubnaha muddo-xileedkoodu dhammaanayo.
2. Marka ay helaan dalabka Guddoomiyaha Guddida Cadaaladda, Shir-Guddoonnada labada gole ee Sharci-dejintu waxay ku war-gelinayaan Guddi- hoosaadyada qaabilsan arrimaha Garsoorka in ay u soo xulaan xubnaha cusub ee Guddida Cadaaladda loo doonayo.
3. Guddi-hoosaad waliba waxay Shir-Guddoonka golaheeda u gudbineysaa magacyada iyo macluumaadka shakhsi (CV-yada) afar qof oo buuxinaya shuruudaha Dastuurka iyo Xeerkan ku cad, si uu golahaasi uga doorto laba xubnood.
4. Shir-Guddoonka gole kastaa wuxuu ku celin karaa Guddi-hoosaadda golihiisa ee soo gudbisey magacyada, xubinta Shir-Guddoonku u arko in aanay buuxin shuruudaha laga doonayo xubnaha loo dooranayo ka-mid-ahaanshaha Guddida Cadaaladda; Guddi-hoosaadduna waa in ay Shir-Guddoonka ugu gudbiso beddelka xubinta Shir-Guddoonku ku soo celiyey muddo 7 (todoba) cisho gudahood ah.
5. Xubin Guddida Cadaaladda ah ee gole Sharci-dejineed soo magacaabay, muddo-xileedkeeduna dhammaanayo, golehaasi hal mar ayuu dib u soo magacaabi karaa, iyadoo la raacayo hab-raaca qodobkan ku xusan, haddii ay Guddi-hoosaadda ku shaqada lihi caddayso in xubintu mutaysatay dib-u- magacaabid.
6. Shir-Guddoonka gole kastaa marka uu helo magacyada afar xubnood oo buuxinaya shuruudaha u yaal, wuxuu hor-geynayaa Golihiisa oo markiiba laba xubnood u kala codaynaya, ka dib marka golaha loo akhriyo war-bixinta Guddi-hoosaadda iyo macluumaadka shakhsi ee xubin kasta, waxaana xubinnimada Guddida Cadaaladda ku guuleysanaya laba xubnood ee ka soo kala guuleysta labada xubnood ee kale.
7. Shir-Guddoonka gole kastaa wuxuu u gudbinayaa Guddoomiyaha Guddida Cadaaladda, magacyada labada xubnood ee golihiisu u magacaabay ka-mid- noqoshada Guddida Cadaaladda.
8. Guddoomiyaha Guddida Cadaaladdu, markuu helo magacyada xubnaha goleyaasha Sharci-dejintu u soo magacaabeen ka-mid-noqoshada Guddida Cadaaladda, wuxuu 14 (afar iyo toban) cisho gudahood xafiiskiisa ugu dhaarinayaa xubnahaa xilka xubinnimada Guddida Cadaaladda.
9. Muddo-xileedka xubinta Guddida Cadaaladda ee Goleyaasha Sharci-dejintu soo magacaabaan waxay ka bilaabmaysaa maalinta xilka loo dhaariyo.

## Qodobka 58aad
## Shuruudaha xubnaha Guddida Cadaaladda ee Goleyaasha Sharci-Dejintu soo Magacaabayaan

1. Labada xubnood ee Golaha Guurtidu u soo magacaabayo ka-mid-noqoshada Guddida Cadaaladdu, waxay kala yihiin xubin culimo ah iyo xubin dhaqan-yaqaan ah, xubin kastaana waa in ay buuxisaa shuruudahan soo socda:
   (b) Xubinta laga soo xulanayo culimadu waa:
      (i) In ay haystaa shahaado Jaamacadeed oo Shareecada Islaamka ah oo dalka laga

aqoonsan yahay, ama ay ka mid tahay culimada dalka ee magaca ku leh aqoonta Shareecada Islaamka;
(ii) In aanay ka tirsanayn koox ama urur diimeed oo cayiman;
(iii) In lagu yaqaan bulshada dhexdeeda akhlaaq-wanaag, sumcad-fiicni, daacadnimo, cadaalad, dhawrsanaan iyo afkaar-furfurnaan;
(iv) In aan da'adeedu ka yarayn 40 jir, kana weyneyn 60 jir;
(v) In ay diyaar u tahay in ay waqti u hurto hawlaha Guddida Cadaaladda;
(vi) In ay caafimaad ahaan u gudan karto xilka Guddida Cadaaladda;
(vii) In ay dalka deggen tahay;
(viii) In a aqoon u leedahay garsoorka dalka iyo sida uu u shaqeeyo;
(ix) In ay leedahay il-dhaqaale oo ay nolosheedu ku tiirsan tahay;
(x) In aanay xubin ka ahayn xisbi ama urur siyaasadeed.

(t) Xubinta laga soo xulayo dhaqan-yaqaanku waa:
(i) Inay ka mid tahay dhaqan-yaqaannada dalka ee ku xeel-dheer arrimaha dhaqanka bulshada Somaliland iyo xeer- beegtinimada;
(ii) In ay ka soo shaqaysay arrimaha dhaqanka muddo aan ka yarayn 10 sano;
(iii) In ay caan ku tahay bulshada dhexdeeda akhlaaq-wanaag, sumcad-fiicni, daacadnimo, cadaalad, dhawrsanaan, run-sheegnimo iyo xil-kasnimo;
(iv) In aanay da'adeedu ka yarayn 40 jir, kana weyneyn 60 jir;
(v) In ay diyaar u tahay in ay waqti u hurto hawlaha Guddida Cadaaladda;
(vi) In uu caafimaad ahaan u gudan karto xilka Guddida Cadaaladda;
(vii) In ay dalka degan tahay;
(viii) In ay aqoon u leedahay garsoorka dalka iyo sida uu u shaqeeyo
(ix) Inay leedahay il-dhaqaale oo ay nolosheedu ku tiirsan tahay;
(x) In aanay xubin ka ahayn xisbi ama urur siyaasadeed.

2. Labada xubnood ee uu Golaha Wakiilladu u soo magacaabayo ka-mid-noqoshada Guddida Cadaaladdu, waxay kala yihiin xubin ganacsatda ka socoto iyo xubin aqoon-yahanka ka soocto, xubin kastaana waa in ay buuxisaa shuruudahan soo socda:

(b) Xubinta laga soo xulayo ganacsatadu waa:
(i) In ay leedahay aqoon heer Jaamacadadeed oo Sharci ama Shareeco ah;
(ii)In ay leedahay liisan ganacsi, hawl ganacsina u socoto;
(iii) In aanay dacwad ay dhinac ka tahay ka socon maxkamadaha dalka ama aanu si joogto ah ugu yeelan dacwado maxkamadaha;
(iv) In ay aqoon u leedahay habka Garsoorka Somaliland u shaqeeyo;
(v) In ay caan ku tahay bulshada dhexdeeda akhlaaq-wanaag, sumcad-fiicni, daacadnimo, cadaalad, dhawrsanaan, run-sheegnimo iyo xilkasnimo;
(vi) In aan da'adeedu ka yarayn 40 jir, kana weyneyn 60 jir;
(vii) In ay diyaar u tahay in ay waqti u hurto hawlaha Guddida Cadaaladda;
(viii) In ay caafimaad ahaan u gudan karto xilka Guddida Cadaaladda;
(ix) In ay dalka deggen tahay;
(x) In ay leedahay il-dhaqaale oo ay nolosheedu ku tiirsan tahay;
(xi) In aanay xubin ka ahayn xisbi ama urur siyaasadeed.

(t) Xubinta laga soo xulayo aqoon-yahanku waa:
(i) In ay leedahay aqoon heer Jaamacadadeed oo sharci ah;
(ii) In aanay haysan ruqsad qareennimo;
(iii) In ay caan ku tahay bulshada dhexdeeda akhlaaq-wanaag, sumcad-fiicni, daacadnimo, cadaalad, dhawrsanaan, run-sheegnimo iyo xilkasnimo;
(iv) In aan da'adiisu ka yarayn 40 jir kana weynayn 60 jir
(v) In ay diyaar u tahay in ay waqti u hurto hawlaha Guddida Cadaaladda;

(vi) In ay caafimaad ahaan u gudan karto xilka Guddida Cadaaladda;
(vii) In ay dalka deggen tahay;
(viii) In ay aqoon u leedahay garsoorka dalka iyo sida uu u shaqeeyo;
(ix) In ay leedahay il-dhaqaale oo ay nolosheedu ku tiirsan tahay;
(x) In aanay xubin ka ahayn xisbi ama urur siyaasadeed.

## Qodobka 59aad
## Waxyaabaha Ka Reebban xubinta Guddida Cadaaladda

Xubinta Guddida Cadaaladda waxa ka reebban:

1. In ay debedda u saarto xogta shirarka, sida doodaha iyo go'aammada xubnaha Guddida intaan si rasmi ah go'aammada Guddidu u soo bixin;
2. In ay si toos ah ama si dadban ugu lug yeelato dacwadaha Maxkamadaha ka socda, marka laga reebo Xeer-Ilaaliyaha Guud oo isna ku koobnaanaya inta xeerku u oggol yahay;
3. In ay xilkeeda Guddi u adeegsato si ay cadaadis ugu saarto, saamayn ugu yeelato ama fara-gelin ugu samayso nidaamka garsoorka si ay dano shakhsi ah ugaga faa'iideysato ama cid kale ugaga faa'iideyso;
4. In ay xidhiidh ka baxsan shaqada ay u xilsaaran tahay, oo horseedi kara in ay dano gaar ah ka fushato ama ay cid kale uga fuliso, la yeelato garsooreyaasha ama ku-xigeennada Xeer- Ilaaliyaha Guud; ama kooxaysi ama dano gaar ah;
5. In ay cid ugu ololayso ama ku difaacdo qabyaalad ama kooxaysi ama dano gaar ah;
6. In ay ku kacdo fal kasta oo kale oo dhaawacaya madax-bannaanida shaqo ee garsoorka.

## Qodobka 60aad
## Xafiiska Maamulka iyo Agaasinka kormeerka ee Guddida Cadaaladda

1. Guddida Cadaaladdu waxay leedahay Xafiis Maamul oo uu madax ka yahay Agaasimaha Maamulka ee Guddida Cadaaladdu.
2. Xafiiska Maamulka Guddida Cadaaladdu wuxuu ka kooban yahay Agaasimaha Maamulka ee Guddida oo hoos-yimaadda Guddoomiyaha Guddida Cadaaladda iyo hawl-wadeenno kale hadba inta loo baahdo.
3. Agaasimaha Maamulka ee Guddida Cadaaladdu wuxuu u xil-saaran yahay:
   (b) Diyaarinta iyo maamulka miisaaniyadda Guddida,
   (t) Socodsiinta hawl-maalmeedka Guddida,
   (j) Ururinta xogaha iyo war-bixinaha garsooreyaasha Maxkamadaha Hoose iyo ku-xigeennada Xeer-Ilaaliyaha Guud,
   (x)Gudashada hawlaha kale ee Guddoomiyaha ama Guddidu u xil-saarto.
4. Guddida Cadaaladdu waxa kale oo ay leedahay Agaasinka Kormeerka iyo Daba-galka Garsoorka oo ay ka hawl-galaan kormeerayaal ay magacawdo Guddida Cadaaladdu.
5. Agaasinka Kormeerka iyo Daba-galka Garsoorka waxa madax ka ah Agaasimaha Kormeerka iyo Daba-galka Garsoorka oo hoos-yimaadda Guddoomiyaha.
6. Agaasinka Kormeerka iyo Daba-galka Garsoorka waxa uu u xil-saaran yahay:
   (b) daraasaynta iyo kormeerka hawl-gudashada iyo hab-dhaqanka garsooreyaasha Maxkamadaha Hoose, ku-xigeennada Xeer-Ilaaliyaha Guud iyo hawl-wadeenka kale ee garsoorka ee heer gobol iyo degmo;

(t) Diyaarinta iyo u-gudbinta Guddida Cadaaladda war-bixinaha iyo daraasadaha uu sameeyo;
(j) Baadhista, marka loo xil-saaro, cabashooyinka laga keeno garsooreyaasha iyo ku-xigeennada Xeer-Ilaaliyaha Guud;
(x) Gudashada hawlaha kale ee Guddoomiyaha ama Guddidu u xil-saarto.

7. Guddida Cadaaladdu waxay qoran kartaa la-taliyeyaal iyo khabiirro hadba inta ay u baahato.

## Qodobka 61aad
## Hawl-Wadeennada Garsoorka

Hawl-wadeennada Hay'adda Garsoorku waxay ka koobnaan karaan:

1. Hawl-wadeennada Maxkamadaha oo ka kooban:
   (b) Garsooreyaal;
   (t) La-taliyeyaal iyo khabiirro, marka loo baahdo;
   (j) Hawl-wadeenno maamul;
   (x) Kaaliyeyaal;
   (kh) Gaadhsiiyeyaal; iyo
   (c) Shaqaalaha kale ee loo baahdo.
2. Hawl-wadeennada Xafiiska Xeer-Ilaalinta oo ka kooban:
   (b) Ku-Xigeenno Xeer-Ilaaliye Guud;
   (t) Dacwad-Oogeyaal (Doodeyaal);
   (j) La-taliyeyaal iyo khabiirro, marka loo baahdo;
   (x) Hawl-wadeenno maamul;
   (kh) Gaadhsiiyeyaal; iyo
   (d) Shaqaalaha kale ee loo baahdo.
3. Hawl-wadeennada Guddida Cadaaladda oo kakooban:
   (b) Agaasimaha Maamulka;
   (t) Agaasimaha Kormeerka iyo Daba-galka Garsoorka iyo Kormeereyaasha;
   (j) La-taliyaal iyo khabiirro, marka loo baahdo;
   (x) Madax-qaybeedyo;
   (kh) Shaqaalaha kale ee loo baahdo.

## Qodobka 62aad
## Magacaabista Garsooreyaasha iyo Ku-Xigeennada Xeer-Ilaaliyaha Guud

1. Qof kasta oo loo magacaabayo garsoore ama ku-xigeen Xeer-Ilaaliye Guud, waa in uu buuxiyo shuruudaha soo socda:
   (b) Waa in uu u dhashay Somaliland, da'diisuna ka yarayn 25 jir;
   (t) Waa in uu shahaado Jaamacadeed oo xagga sharciga ah ka haysto jaamacad la aqoonsan yahay ama uu haysto wax u dhigma, iyadoo ay Guddida u bannaan tahay in ay qofka ka qaaddo imtixaan, si waafaqsan hab-raaca ku cad hagaha Guddidu u dejisey shaqo-qorista;
   (j) Waa in uu codsi u soo qorto Guddida kuna soo hagaajiyo Guddoomiyaha Guddida Cadaaladda;
   (x) Waa in uu ku sifoobo akhlaaq wanaagsan bulshada dhexdeeda;
2. Haddii Guddida Cadaaladdu ku qanacdo in qofkaasi uu mudan yahay in loo

magacaabo Garsoore ama ku- xigeen Xeer-Ilaaliye Guud, waxay go'aamineysaa magacaabistiisa.
3. Magacaabista garsooreyaasha iyo ku-xigeennada Xeer- Ilaaliyaha Guud ee cusub waxay ku imanaysaa baahi loo baahday garsooreyaal cusub ama ku-xigeenno Xeer-Ilaaliyaha Guud oo cusub, waxaana lagu baahinayaa warbaahinta.
4. Magacaabista Garsooreyaasha ama ku-xigeennada Xeer-Ilaaliyaha Guud ee cusub, waxa lagu baahinayaa Faafinta Rasmiga ah iyo in ka mid ah noocyada kale ee warbaahineed.

## Qodobka 63aad
## Tababarka Garsooreyaasha iyo Ku-Xigeennada Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Cusub

1. Garsooraha cusub ee loo qaato si waafaqsan qodobka 63aad ee Xeerkan, wuxuu gelayaa tababar darajada koowaad, isagoo ka qayb-gelayaa dhegeysiga dacwadaha ka socda maxkamadaha, muddada sannadka ahna ku jiraya tijaabo.
2. Guddoomiyaha Maxkamadda uu tababarka ku qaadanayo garsooraha cusubi, wuxuu Guddida Cadaaladda u gudbinayaa war-bixinaha saddex- biloodlaha ah ee Garsooraha tababarka ku jira.
3. Ku-xigeennada Xeer-Ilaaliyaha Guud ee cusub, marka aanu hore u ahayn doode, wuxuu qaadanayaa tababar muddo sannad ah oo uu ku qaadanayo xafiisyada Xeer-Ilaalinta degmooyinka iyo gobollada, isaga oo dacwadaha oogistooda kala qayb-gelaya doodeyaasha iyo ku-xigeennada Xeer- Ilaaliyaha Guud, waxaana warbixino saddex-biloodle ah ka siinaya Guddida Cadaaladda masuulka xafiiska uu tababarka ku qaadanayo.

## Qodobka 64aad
## Dallacaadda Garsooreyaasha

1. Garsoore kastaa marka uu ku biro Hay'adda Garsoorka, wuxuu shaqada Garsoorkaka bilaabayaa Garsoore Maxkamad Degmo.
2. Garsooraha Maxakamad Degmo, marka uu 3 (saddex) sano ku shaqeeyo xilkaas, wuxuu uga dallici karaa Guddoomiye Maxkamad Degmo ama garsoore Maxkamad Gobol, iyadoo uu ku mutaysan karo asluub-wanaaggiisa iyo shaqo-wanaaggiisa.
3. Guddoomiyaha Maxkamad Degmo, marka uu ugu yaraan 3 (saddex) sano ku shaqeeyo xilkaa, wuxuu uga dallici karaa Garsoore Maxkamad Gobol, iyada oo uu ku mutaysan karo asluub-wanaaggiisa iyo shaqo- wanaaggiisa.
4. Garsooraha Maxakamad Gobol, marka uu ugu yaraan 3 (saddex) sano ku shaqeeyo xilkaas, wuxuu uga dallici karaa Guddoomiye Maxkamad Gobol ama garsoore Maxkamad Racfaan, iyadoo uu ku mutaysan karo asluub-wanaaggiisa iyo shaqo-wanaaggiisa. yaraan 3 (saddex) sano ku shaqeeyo xilkaas, wuxuu uga dallici karaa, garsoore Maxakamad Racfaan, iyadoo uu ku mutaysan karo asluub-wanaaggiisa iyo shaqo-wanaaggiisa.
6. Garsoore Maxkamad Racfaan, marka uu ugu yaraan 3 (saddex) sano ku shaqeeyo xilkaas, wuxuu uga dallici karaa Guddoomiye Maxkamad Racfaan ama garsoore Maxkamadda Sare, iyadoo uu ku mutaysan karo asluub-wanaaggiisa iyo shaqo-wanaaggiisa.
7. Guddoomiye Maxkamad Racfaan, marka uu ugu yaraan 3 (saddex) sano ku

shaqeeyo xilkaas, wuxuu uga dallici karaa garsoore Maxkamadda Sare.

8. Habka dallacaaddu wuxuu mar kasta ku imanayaa bannaanida darajada ka sarraysa ta uu qofku markaa joogo, haddii aanay jirin sababo sharci ah oo ka hor- joogsadaa.

9. Waxa kale oo Garsooraha ama Guddoomiyaha lagu dallacsiin karaa tayada shaqo ee uu qabto.

10. Doodaha heer degmo, marka uu ugu yaraan 3 (saddex) sano ku shaqeeyo xilkaas, wuxuu uga dallici karaa doode heer Gobol ah, iyadoo uu ku mutaysan karo asluub-wanaaggiisa iyo shaqo-wanaaggiisa.

11. Doodaha heer Gobol, marka uu ugu yaraan 3 (saddex) sano ku shaqeeyo xilka uu hayo, wuxuu uga dallici karaa ku-xigeen Xeer-Ilaaliyaha Guud oo heer gobol ah, iyadoo uu ku mutaysan karo asluub-wanaaggiisa iyo shaqo-wanaaggiisa.

12. Ku-xigeenka Xeer-Ilaaliyaha Guud ee heer Gobol, marka uu ugu yaraan 3 (saddex) sano ku shaqeeyo xilkaas, wuxuu uga dallici karaa ku-xigeen Xeer- Ilaaliyaha Guud ee heer Qaran, iyadoo uu ku mutaysan karo asluub-wanaaggiisa iyo shaqo-wanaaggiisa.

## Qodobka 65aad
## Shaqo-ka-Fadhiisashada Garsooreyaasha iyo Ku- Xigeennada Xeer-Ilaaliyaha Guud

1. Muddada uu garsoore ama ku-xigeen Xeer-Ilaaliyaha Guud uu caadi ahaan hawl-gab ku geli karaa waa 65 jir.
2. Ka-sokow xaaladda hawl-gabka ee ku xusan faqradda1aad ee qodobkan, garsoore ama ku-xigeen Xeer-ilaaliyaha Guud wuxuu shaqada kaga bixi karaa:
   (b) In uu garsooruhu ama ku-xigeenka Xeer- Ilaaliyaha Guud iskii shaqada isaga casilo Guddida Cadaaladduna ka aqbasho;
   (t) In garsooraha ama ku-xigeenka Xeer-Ilaaliyaha Guud ay ku timaaddo caafimaad-darro uu ka gudan kari waayo xilkiisa, xaaladdasna ay caddayso Guddida Caafimaadka Qaranku;
   (j) In garsooraha ama ku-xigeenka Xeer-Ilaaliyaha Guud ay shaqada ka erido Guddida Cadaaladdu, ka dib marka ay ku suganto garsooraha ama ku-xigeenka Xeer- Ilaaliye Guud arrin xilka lagaga qaadi karaa;
   (x) In garsooraha ama ku-xigeenka Xeer-Ilaaliyaha Guud dembi ciqaabeed oo maxkamad horteed kaga cadaaday ay Maxkamad awood u lihi kaga xukuntay xadhig kama-dambays noqday, ka dib marka ay Guddida Cadaaladdu dhawrsanaanta ka xayuubisay;
3. Garsooraha ama ku-xigeenka Xeer-Ilaaliyaha Guud ee gaadhay da'ada hawl-gabka, marka baahi darteed looga maarmi waayo in uu sii shaqeeyo, Guddida Cadaaladdu waxa aydib ugu dhigi kartaa xilliga hawl- gabkiisa muddo aan ka badnayn 5(shan) sano.

## Qodobka 66aad
## Dhaarta Xubnaha Waaxda Garsoorka

Waxa ku waajib ku ah hawl-wadeennada hay'adda Garsoorka in ay dhaartaan inta aanay shaqada Qaranka bilaabin, sida soo socota:

1. Ilaaliyaha Guud waxay Madaxweynaha hortiisa ku marayaan dhaarta Dastuuriga ah ee ku xusan qodabka 129aad ee Dastuurka.
2. Garsooreyaasha Maxkamadaha iyo Ku-Xigeennada Xeer-Ilaaliyaha Guud, waxay

Guddoomiyaha Maxkamadda Sare hortiisa ku dhaaranayaan dhaarta Dastuuriga ah ee ku xusan qodabka 129aad ee Dastuurka.
3. Kaaliyeyaasha iyo gaadhsiiyeyaasha Maxkamaduhu, waxay kaga hor-dhaaranayaan Guddoomiyeyaasha Maxkamadaha Racfaanka ee ay hoos yimaadaan, dhaarta Dastuuriga ah ee ku xusan qodabka 129aad ee Dastuurka.

**Qodobka 67aad**
**Darajada Xubnaha Waaxda Garsoorka**

1. Darajada Xubnaha garsoorku waa sida hoos ku xusan.

(b) Darajada garsooreyaasha iyo guddoomiyeyaasha Maxkamadaha:

| | | |
|---|---|---|
| i. | Garsoore Tababare ah | A7 |
| ii. | Garsoore Maxkamad Degmo | A6 |
| iii. | Guddoomiye Maxkamad Degmo | A5 |
| iv. | Garsoore Maxkamad Gobol | A5 |
| v. | Guddoomiye Maxkamad Gobol | A4 |
| vi. | Garsoore Maxkamad Racfaan | A4 |
| vii. | Guddoomiye Maxkamad Racfaan | A3 |
| iii. | Garsoore Maxkamad Sare | A2 |
| ix. | Guddoomiye Maxkamad Sare | A1 |

(t) Darajada Ku-Xigeennada Xeer-Ilaaliyaha Guud iyoXeer-Ilaaliyaha Guud:

| | | |
|---|---|---|
| x. | Ku-Xigeen Xeer-Ilaaliyaha Guud oo Tababarte ah | A7 |
| xi. | Ku-Xigeen Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Degmo | A5 |
| xii. | Ku-Xigeen Xeer-ilaaliyaha Guud ee Gobol | A4 |
| iii. | Ku-Xigeen Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Xarunta | A3 |
| iv. | Xeer-Ilaaliyaha Guud | A1 |

(j) Hawl-Wadeennada kale ee Garsoorka waxa darajooyinkooda dejineysa Guddida Cadaaladda si waafaqsan xeerarka khuseeya.

2. Mushaharka iyo gunnooyinka ay darajooyinkooda ku qaadanayaan, garsooreyaasha, Xeer-ilaaliyaha Guud, ku-xigeennada Xeer-ilaaliyaha guud, hawl-wadeennada kale iyo shaqaalaha garsoorku, waxa hadba Xeer-Madaxweyne ku soo saaraya Madaxweynaha.

**Qodobka 68aad**
**Magacaabis Gaar ah iyo Mid Ku-Meel-Gaadha**

1. Marka ay jirto baahi lama huraan ah, Guddida Cadaaladdu waxayu magacaabi kartaa garsoore ama Guddoomiye Maxkamad Gobol ama Degmo aqoonyahan
2. Marka ay jirto baahi deg-deg ahi, haddii aan la hayn garsoore leh darajadii loo baahnaa oo noqon kara Guddoomiye Maxkamad Racfaan, Guddida Cadaaladdu waxay garsoore ka tirsan Maxakamada Sare si ku meel gaadh ah ugu magacaabi kartaa Guddoomiye Maxkamad Racfaan.
3. Sida ku cad Qodobka 108aad ee Dastuurka Guddida Cadaaladda ayaa u xil saaran shaqo-siinta, xil-ka- qaadista, dallacaadda, hoos-u-dhigidda, bedelaadda iyo anshax-marinta garsoorayaasha maxkamadaha hoose (maxkamadaha racfaanka, gobollada iyo degmooyinka} iyo Kuxigeenada Xeer-ilaaliyaha Guud.

**Qodobka 69aad**

**Isku-Beddelka Garsooreyaasha iyo Ku-Xigeennada Xeer-Ilaaliyaha Guud**

1. Guddida Cadaaladdu waxay garsoore maxkmad hoose u beddeli kartaa ku-xigeen Xeer-Ilaaliye Guud, waxaanay ku-xigeen Xeer-Ilaaliye Guud u beddeli kartaa Garsoore maxkamadeed marka ay Guddidu u aragto in sidaa ay ku jirto danta shaqadu.
2. Garsooraha loo beddelo ku-xigeen Xeer-Ilaaliyaha Guud ama ku-xigeenka Xeer-Ilaaliyaha Guud ee loo beddelo garsoore maxkamadeed, wuxuu lahaanayaa darajadii hore ee uu lahaa, marka aanu beddelku ku iman tallaabo anshax-marineed oo wadata darajo- dhimis.

**Qodobka 70aad**
**La-taliye Shisheeye**

1. Si ku-meel-gaadh, horumarinta garsoorka darteed, waxa Guddida Cadaaladdu qoran kartaa La-taliye shisheeye oo ku xeel dheer xagga sharciga iyo hawlaha garsoorenimada oo looga faa'iidayn karo garsooreyaasha waddaniga ah, waxa se shardi ah inuu muslin yahay isla markaana aanu jirin garsoore waddani ah oo buuxin Kara kaalinta loo qaadanayo La-taliyaha shisheeye.
2. Muddada uu shaqada ku jiro La-taliyahaasi waxa la siin karaa xuquuqda iyo xishmada uu leeyahay garsooraha ka hawl-gala jagada loo qaatay mid la mid ah.

**Qodobka71aad**
**Dhawrsanaanta Garsooraha ama Ku-Xigeenka Xeer-Ilaaliyaha Guud**

1. Garsoore ama ku-xigeen Xeer-Ilaaliyaha Guud lama xidhi karo maxkamadna lama hor geyn karo, haddaanay oggolaan Guddida Cadaaladdu ama aan lagu qaban isagoo faraha kula jira dembi ciqaabtiisa tahay ugu yaraan 3 (saddex) sano, iyadoo markaana si deg-deg ah loo ogeysiinayo Guddida Cadaaladda.
2. Haddii garsoore ama ku-xigeen Xeer-Ilaaliyaha Guud loo xidho hab waafaqsan faqradda 1aad ee qodobkan, waxa lagu xidhayaa goob gaar ah oo sharaftiisa garsoorenimo ama ku-xigeen Xeer-Ilaalaha Guud u qalanta, waxaana reebban in lala xidho maxaabiis kale.

**Qodobka 72aad**
**Shaqo-ka-Joojinta Garsooraha ama Ku-Xigeenka Xeer- Ilaaliyaha Guud**

Iyadoo laga duulayo Qodobka 108aad ee Dastuurka
1. Guddida Cadaaladdu ayaa uxil-saaran shaqo-siinta, xil-ka-qaadista, dallacaadda, hoos-u-dhigidda, bedelaadda iyo anshax-marinta garsoorayaasha maxkamadaha hoose (maxkamadaha racfaanka, gobollada iyo degmooyinka} iyo Ku-xigeenada Xeer-ilaaliyaha Guud. Shaqaalaha kale ee ka shaqeeya Garsoorka waxay hoos imanayaan xeerarka shaqaalaha Dawladda.
2. Ka-joojinta shaqada garsooraha ama ku-xigeenka Xeer-Ilaaliyaha Guud saamayn kuma yeelanayso mushaharkiisa, xataa haddii la eryo waxa la siinayaa mushaharka iyo gunnooyinka ka maqan ee uu mutaystay bilihii uu shaqeeyey iyo wixii xuquuq ah ee kale ee u bislaaday muddadii uu shaqaynayey.

3. Xeer-ilaaliyaha Guud ayaa Guddida ka hor oogaya eedda ka xayuubinta dhawrsanaanta, anshax-marinta garsoorayaasha iyo Ku-xigeenada Xeer-ilaaliyaha Guud.

## Qodobka 73aad
## Habka Qaadista Dacwadda Anshaxa

1. Fadhiyada Guddida Cadaaladdu, marka ay qaadayso dacwada anshax, waa mid xidhan.
2. Waxa waajib ku ah Guddida Cadaaladda in ay fursad u siiyo garsooraha ama ku-xigeenka Xeer-Ilaaliyaha Guud ee lagu oogay dacwadda anshaxa in uu iska difaaco falalka anshax ee lagu soo eedeeyey, waxaana laga oggolaanayaa caddayn kasta oo uu isku difaacayo.
3. Way u bannaan tahay garsooraha ama ku-xigeenka Xeer-Ilaaliyaha Guud in uu isagu is-difaaco ama cid kale wakiisho amaba qareen qabsado.
4. Haddii uu Garsooruhu ama ku-xigeenka Xeer- Ilaaliyaha guud ee dacwaddu ku socotaa ka soo qayb- geli waayo fadhiga Guddidu ku dhegeysaneyso dacwaddiisa, waxa u bannaan Guddida in ay sii waddo dhegeysiga dacwadda isaga oo maqan, ka dib marka ay hubiso in si waafaqsan sharciga loo gaadhsiiyey xilliga dhegeysiga dacwadda iyo nuqulka eedda loo soo jeediyey.

## Qodobka 74aad
## Qaraarka Guddida

1. Waxaa waajib ah in ay ku caddahay qaraarka Guddida Cadaaladda asbaabtii ay Guddidu u cuskatay go'aankeeda iyo qodobbada lagu saleeyey.
2. Fadhi qarsoodi ah ayuu Guddoomiyaha Guddidu ku akhriyayaa qaraarka Guddida, haddii uu joogo garsooraha ama ku-xigeenka Xeer-Ilaaliyaha Guud ee dacwaddu khusaysaa, haddii se garsooraha ama ku- xigeenka Xeer-Ilaaliyaha Guud ee dacwaddu khusaysaauu maqan yahay, waxa la gaadhsiinayaa nuqul ka mid ah qaraarka.
3. Nuqul ka mid ah qaraarka waxaa la siinayaa garsooraha ama ku xigeenka Xeer-Ilaaliyaha Guud ee dacwadda anshaxa lagu qaaday, nuqulna waxaa la gelinayaa faylkiisa.
4. Waxaa ku waajib ah Wasaaradda Cadaaladda in ay ku fuliso Qaraarka Guddida Cadaaladda ee ku sheegan Farqadda 1aad ee qoddobkan, muddo 15 (Shan iyo toban) cisho gudahood ah, haddii aan qaraarka laga qaadan cabasho dib-u-eegis ah.

## Qodobka 75aad
## Noocyada Qaraarrada Anshax-Marinta

Waxa u bannaan Guddida Cadaaladda in ay garsooreyaasha ama ku-xigeennada Xeer-Ilaaliyaha Guud ku riddo mid ka mid ah Anshax-marinahan soo socota midkood, iyadoo loo eegayo culayska gefkooda:

(b) Canaan af ah;
(t) Canaan qoraal ah oo faylka loo geliyo;
(j) U-beddelid goob kale oo Guddida Cadaaladdu u aragto in ay culays ku tahay;
(x) Gunno-ka-jarid aan ka badnayn mushahaarkiisa badhkii muddo aan ka badnayn 6 (lix) bilood;

(kh)Hoos-u-dhigid hal darajo;
(d) Shaqo-ka-joojin aan ka badnayn muddo 6 bilood ah;
(r) Shaqo-ka-saarid;
(Sh) Maxkamad-hor-geyn.

**Qodobka 76aad**
**Ka-Cabashada Qaraarrada Anshax-Marinta ee Guddida Cadaaladda**

1. Garsooraha ama ku-xigeenka Xeer-Ilaaliyaha Guud ee uu ku dhacay go'aanka anshax-marinta ee Guddida Cadaaladdu, waxa u bannaan in uu cabasho sababaysan oo dib-u-eegis ah u qorto Guddida Cadaaladda 15 maalmood gudahood oo ka bilaabanta marka qaraarka lagu dhawaaqay ama la gaadhsiiyey nuqul qaraarka ah, haddii uu ka maqnaa fadhigii lagu akhriyey qaraarka.
2. Guddida Cadaaladdu marka ay hesho cabashada garsooraha ama ku-xigeenka Xeer-Ilaaliyaha Guud ee anshax-marintu ku dhacday, dhegeystana dooddiisa iyo jawaabta xeer-Ilaaliyaha Guud, waxa u bannaan: -
   (b) In ay ayiddo go'aankeedii hore;
   (t) In ay wax ka beddesho go'aankeedii hore.
   (j) In ay baabiiso eeddii iyo anshax-marintii labadaba, marka ay hesho caddaymo cusub oo muujinaya in aanay jirin sababihii lagu saleeyey go'aankii hore ee anshax-marineed, garsooraha ama ku-xigeenka Xeer-Ilaaliyaha Guudna u celiso sharaftiisii.
3. Ma bannaana in wax-ka-beddelka codsiga dib-u- eegistu u keento garsooraha ama ku-xigeenka Xeer- Ilaaliyaha Guud anshax-marin ka culus ta uu ka cabanayo.
4. Go'aammada dib-u-eegista ee ka soo baxa Guddida Cadaaladdu waa kama-dambays.
5. Go'aanka anshax-marinta ee ah shaqo-ka-joojinta ama shaqo-ka-saaridda garsooraha ama ku-xigeenka Xeer-Ilaaliyaha Guud wuxuu dhaqan-gelayaa isla marka lagu dhawaaqo go'aanka, dib-u-eegistana garsooruhu ama ku-xigeenka Xeer-Ilaaliyaha Guud wuxuu qaadanayaa isagoo debedda ka jooga shaqada.

**Qodobka 77aad**
**Xeer-Anshaxeedka Garsoorka**

1. Guddida Cadaaladdu waxay soo saaraysaa Xeer- Anshaxeedka Garsoorka (Judiciary Code of conduct).
2. Xeer-Anshaxeedka Garsoorka, waxaa lagu faahfaahinyaa hab-dhaqanka iyo anshaxa laga rabo dhammaan garsooreyaasha, ku-xigeennada xeer- Ilaaliyaha Guud iyo hawl-wadeennada kale ee Hay'adda Garsoorka.
3. Xeer-anshaxeedka garsoorka waxaa lagu faahfaahinayaa gefefka ka dhici kara hawl- wadeennada garsoorka, tallaabooyinka anshax- marineed ee lagu mutaysan karo gefefka, hab- raacyada loo marayo dhegeysiga dacwadaha anshaxa, qaabka loo fulinayo qaraarrada anshaxx-marinta iyo wixii kale ee lama huraan ah ee aan xeerkan ka hor imanayn.

**QAYBTA SHANAAD**
**XUQUUQAHA GARSOORKA**

## Qodobka 78aad
## Mushaharka Hawl-Wadeenada Garsoorka

1. Guddoomiyeyaasha Maxkamadaha, garsooreyaasha, Xeer-Ilaaliyaha Guud iyo ku-xigeennada Xeer- Ilaaliyaha Guud waxay yeelanayaan mushahar iyo gunnooyin ku habboon heerka noloshooda oo Madaxweynuhu ku soo saaro Xeer Madaxweyne, qiimo dhaca ku yimaadda lacagtana Madaxweynaha ayaa uga cawil celinaya oo ku soo saaraya Xeer Madaxweyne.
2. Mushaharka iyo gunnada hawl-wadeennada kale ee garsoorka waxa goynaya Guddida Cadaaladda.
3. Guddida Cadaaladdu, iyadoo la tashanaysa Wasaaradda Maaliyadda, waxay labadii sanoba mar dib u eegaysaa mushaharka iyo gunnooyinka hawl- wadeennada garsoorka (la-taliyeyaasha, khabiirrada, kaaliyeyaasha, gaadhsiiyeyaasha iyo shaqaale-hoosaadka kale) si miisaaniyadda qaranka looga kabo wixii qiimo dhac ama korodhka maciishadda ah ee yimaadda.

## Qodobka 79aad
## Xuquuqda Hawl-Gabka iyo Dhimasha Hawl- Wadeennada Garsoorka

1. Guddoomiyeyaasha Maxkamadaha, garsooraha, Xeer-Ilaaliyaha Guud ama ku-xigeenka Xeer-Ilaaliyaha Guud hawl-gab ka noqda shaqada, ama iskii shaqada uga taga wuxuu yeelanayaa xaqsiin u dhiganta 25% mushaharkiisii aasaasiga ah ee uu qaadanayey marka uu hawl-gabka galay ama shaqada ka tagey, iyadoo sannadkiiba bil looga soo qaadayo, looguna dhufanayo tirada sannadada uu shaqeynayey.
2. Garsooraha ama ku-xigeenka Xeer-Ilaaliyaha Guud ee dhinta ama la dilo isagoo shaqada garsoorka haya, wuxuu yeelanaya xaqsiinta lagu xusay faqradda 1aad ee qodobkan iyo kharash aas.
3. Xuquuqda Hawl-gabka ama xaqsiinta, haddii uu Garsooruhu ama ku-xigeenka Xeer-Ilaaliyaha Guuddhinto, waxa qaadanaya dhaxleyaashiisa si waafaqsan Shareecada Islaamka.
4. Hawl-wadeennada kale ee Garsoorku waxay xuquuqda hawl-gabka iyo xaqsiinta kala mid noqonayaan shaqaalaha kale ee dawladda.

## Qodobka 80aad
## Daryeelka Caafimaadka Hawl-Wadeennada Garsoorka

Hawl-wadeennada garsoorku waxay yeelanayaan kharash daryeel caafimaad oo miisaaniyadda loogu daro sanad kasta, waxaana cidda loogu deeqayo iyo xaddiga loogu deeqayo ka go'aan-gaadhaysa Guddida Cadaaladda.

# QAYBTA LIXAAD
# QODOBBO ISKU DHAFAN

### *Cutubka I*
### *Shirweynaha Garsoorka*

## Qodobka 81aad
## Shirweynaha Garsoorka

1. Hay'adaha garsoorku waxay yeelanayaan Shirweyne Sannadeed, kaas oo qabsoomaya bisha ku xigta bisha garsoorka fasaxa galo.
2. Guddoomiyaha Maxakamadda Sare ayaa qaban- qaabiya oo baahiya Shirweynaha Garsoorka.
3. Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ayaa guddoomiyaShirweynaha Garsoorka.

## Qodobka 82aad
## Ka-soo-Qaybgaleyaasha Shirweynaha Garsoorka

Shirweynaha Garsoorku wuxuu ka kooban yahay:

1. Guddoomiyaha Maxkamadda Sare & garsooreyaasha Maxkamadda Sare, Guddoomiyeyaasha Maxkamadaha Rafcaanka, Guddoomiyeyaasha Maxkamadaha Gobollada, Guddoomiyeyaasha Maxkamadaha Degmooyinka iyo Dhamaan garsooreyaasha Maxkamadaha;
2. Xeer-Ilaaliyaha Guud iyo ku-xigeennada Xeer- Ilaaliyaha Guud;.
3. Xubnaha Guddida Cadaaladda;
4. Agaasimaha Maamulka iyo Agaasimeyaasha Kormeerka;
5. La-taliyeyaasha Garsoorka haddii ay jiraan;
6. Wasiirka Cadaaladda, oo ka qayb-geli kara, laakiin aan cod lahayn xilliyada codaynta loo baahdo;
7. Guddiyada Shuruucda ee Goleyaasha Sharci-dejinta, oo ka qayb-geli kara, laakiin aan cod lahayn xilliyada codaynta loo baahdo;
8. Kulliyadaha Sharciga ee Jaamacadaha dalka iyo Ururweynaha Qareennada, oo dhammaantood ka qayb-geli kara, laakiin aan cod lahayn xilliyada codaynta loo baahdo;
9. Ciddii kale ee Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ama Guddida Cadaaladdu muhiim u arko ka qayb- galkooda Shirweynaha.

## Qodobka 83aad
## Awoodaha iyo Waajibaadka Shirweynaha Garsoorka

Waajibaadka iyo Awoodaha Shirweynaha Garsoorku waa:

1. In uu ka doodo dhibaatooyinka iyo mushkiladaha la soo gudboonaada Garsoorka, xalna uu u helo;
2. In uu ka doodo go'aanna ka gaadho arrin kasta oo lagu horumarinayo Garsoorka dalka;
3. In uu usoo gudbiyo Wasiirka soo-jeedimo ku saabsan gol-daloolooyinka ku jira xeerarka ay Maxkamaduhu dabbaqaan ee ka soo hor jeeda Dastuurka ama Shareecada Islaamka ama xeerarka u baahan in wax-ka-beddel iyo kaabis lagu sameeyeo, amaba xeerarka cusub eeloo baahan yahay in la dejiyo lana ansixiyo;
4. In uu ansixiyo Qorshaha horumarinta Garsoorka;
5. In uu soo saaro go'aammo iyo amarro waxtar u leh horumarinta iyo sixitaanka garsoorka;
6. In uu qabto hawl kasta oo habsami-u-socodka garsoorka kor u qaadaysa.

## *Cutubka II*
## *Ka-Cabashada Go'aammada*

## Qodobka 84aad
## Racfaannada iyo Cabashooyinka

1. Waxa bannaan in xukun kasta ama qaraar kasta oo Maxkamad Hoose ka soo baxay racfaan looga qaato maxkamad ka sarraysa, iyadoo loo raacayo Xeerarka Habka Madaniga iyo Habka Ciqaabta, waxaana reebban in maxkamadda racfaanka laga qaadanayaa ay is hor-taagto xaqa racfaan-qaadasho.
2. Racfaannada laga qaato xukunnada ama qaraarrada Maxkamadaha Hoose waxay ku dhisnaanayaan xaqiiqooyinka dhabta ah ee dhacdooyinka dacwadaha iyo fasiraadda qoddobada xeer ee dacwadda loo cuskadey.
3. Maxkamadda racfaanka loo soo qaatey waxa u bannaan inay ayiddo, baabiiso, wax ka beddesho xukunkii ama qaraarkii racfaanka looga soo qaatay, amaba ay dib uceliso dacwadda si mar kale loo soo dhegeysto, iyadoo mar kasta sababaynaysa go'aankeeda iyo jiritaanka ama jirtitaan-la'aanta asbaababaha lagu duray xukunka ama qaraarka looga soo racfaan-qaatay.
4. Racfaannada loo soo qaadato Maxkamadda Sare, waxay ku dhisnaanayaan oo keliya qodobbada xeer ee uu khilaafay xukunka ama qaraarka racfaanka laga soo qaatay.
5. Go'aammada Maxkamada Sare waa in ay noqdaan kuwo si faahfaahsan loogu bandhigay halkay iska khilaafeen xaqiiqooyinka dacwadda iyo xeerarka Maxkamadaha Hoose u cuskadeen iyo sida go'aanka Maxkamadda Sare isu waafajiyey taas oo tilmaam, toosin, iyo sixitaan u noqonaysa Maxkamadaha Hoose.
6. Cabashooyinka laga keeno maxkamadaha gobollada ee ku saabsan kuraasida goleyaasha deegaannada iyo go'aammada Komishanka Doorashooyinka Qaranka ee doorashooyinka Golaha Wakiillada iyo Madaxtooyada, Maxakamadda Sare waxay waafajineysaa Dastuurka iyo Xeerarka Doorashooyinka, go'aankeeduna waa kama-dambays.

## Qodobka 85aad
## Muddada Racfaannada

1. Muddada racfaan-qaadashadu waa 30 (Soddon) cisho oo ka bilaabanta, maalinta lagu dhawaaqo go'aanka dacwadda ciqaabta, ama go'aanka dacwadda madaniga ah ama kuwa la bahda ahba la gaadhsiiyo dhinacyada dacwadda oo laga soo saxeexo nuqul xukunka ah.
2. Qoraalka Racfaan-qaadasho waa in uu saxeexnaado, kuna cadday asbaabta racfaanku, haddii aanay asbaabta racfaanka keliftey ku caddeyn qoraalka racfaan-qaadasho, qoraalkaa racfaan-qaadasho lagama qaban karo.
3. Rafcaan-qaadashadu waxay noqon kartaa mid af ah ama ogeysiin qoraal ah oo kooban, waxaana waajib ah in kaaliyaha maxkamadda laga rafcaan-qaadanayaa diiwanka-geliyo gar-maqalkana ku qoro, iyadoo asbaababaha racfaanka oo faahfaahsan loo soo gudbin karo maxkamadda loo racfaan-qaatay.
4. Qoraalka racfaan-qaadasho waxa lagu hagaajinayaa xafiiska Kaaliyaha Maxkamadda go'aankeeda laga racfaan-qaadanayo.
5. Kaaliyaha maxkamadda go'aankeeda laga racfaan-qaadanayo ee qabtay qoraalka racfaan-qaadasho, waa in uu sida ugu dhakhsaha badan qoraalka racfaan- qaadasho u gudbiyo maxkamadda loo racfaan-qaatey, iyadoo gal-dacwadeedkii la socdo.
6. Marka uu xafiiska Xeer-Ilaalinta Guud racfaan ka qaato dacwad ciqaabeed, waxa waajib ah in eedeysanaha lagu gaadhsiiyo nuqulka racfaanka 30 (soddon) maalmood gudahood, laga bilaabo maalinta lagu dhawaaqo go'aanka dacwadda.

7. Haddii muddada racfaan-qaadasho ay ka dhacdo dhinacyada, laakiin dhinac ka mid ah dhinacyada muddada racfaan-qaadasho ka dhacay uu soo gaadhsiiyo Maxkamadda uu u racfaan-qaatay qoraaL racfaan-qaadasho oo ay cadday sababta racfaan- qaadashadu xilligaa ku soo gaadhey, maxkamadda loo racfaan-qaataynaay ku qanacdo, waxa maxkamadda loo racfaan-qaatay u bannaan in ay aqbasho qabashada qoraalka racfaan-qaadahso, haddii aaanay maalintii uu soo baxay go'aanka laga racfaan-qaatay ama maalintii dhinacyada laga saxeexay helidda go'aanku aanay ka soo wareegin muddo sannad ka badani.
8. Muddada ka racfaan-qaadashada qaraarrada garsooruhu wuu ka yarayn karaa 30 (soddon) maalmood, haddii uu lagama maarmaan u arko.
9. Xukunnada ciqaabta dilka ah, racfaankoodu waa khasab danta xukunsanaha awgeed, waana in maxkamadda xukunka dilka ah soo saartay u gudbiso galka dacwadda maxkamadda ka sarraysa xataa marka aanay dhinacyadu racfaan qaadan.

## Qodobka 86aad
## Adeegsiga Qareenka

1. Dhinac kasta oo ka mid ah dhinacyada dacwadaha waxaa u banaan in uu dacwad kasta oo ku lid ah, ama uu dhinac ka yahay, u adeegsado qareen ku xeel dheer sharciga.
2. Qareenku wuxuu adeegga uu bixinayo ku salaynayaa danta qofka uu qareenka u yahay, waxaana reebban in uu cudur-daar la'aan kaga baaqdo fadhiyada maxkamadda ee loo muddeeyey dacwadda uu qareenka ka yahay.
3. Dacwadaha ciqaabta ah, ee ciqaabta lagu mutaysan karaa noqon karto dil, xabsi daa'in ama xadhig ka badan 10 (toban) sano, waxa khasab ah in eedaysanuhu u adeegsado difaaciisa sharci yaqaan qareen ah.
4. Dacwadaha Maxkamadda Sare iyo Maxkamadda Dastuurka waxa ka doodi kara oo keli ah sharci yaqaan qareen ah.
5. Qof kasta oo xorriyaddiisa laga qaadaa wuxuu qabsan karaa, adeegsan karaana qareen laga bilaabo marka la xidho ilaa xukunka dacwaddu ka noqonayo kama-dambays.
6. Cid kasta oo gacanta ku haysa qof xorriyadda laga qaaday waxa ku waajib ah in ay u oggolaato in uu adeegsado qareen ka kaalmeeya dacwadda loo haysto dhamman marxaladaha dacwadda laga bilaabo xilliga la xidho ilaa xukunka dacwaddu ka noqonayo kama- dambays.
7. Qofka la xidhay laguma khasbi karo in uu caddayn qiraal ah bixiyo, haddii aanu qareenkiisu la joogin, qareenkiisuna waa in uu si madax-bannaan oo aanay cidi maqlayn ula kulmaa xilli kasta oo uu doono ama xilli kasta oo qofka xorriyadda laga qaaday la- kulankiisa dalbado.

## *Cutubka III*
## *Fulinta Xukunnada*

## Qodobka 87aad
## Fulinta Xukunnada Ciqaabta ah ee Dilka ah

1. Iyadoo aan wax loo dhimayn nuxurka fulinta xukunnada ciqaabta ee ku xusan Qodobka 248 ee Xeerka Habka Ciqaabta, xukunka dilka ahi marka uu noqdo kama-dambays, Xeer-Ilaaliyaha Guud wuxuu isugu yeedhayaa dhammaan dhaxleyaasha

marxuumka dhintay ee dhimashadiisa dilka lagaga xukumay dil-sugaha, waxaanu kala doorransiinayaa:

(b) In dil-sugaha dilka loogu fuliyo,
(t) In ay dil-sugaha mag ka qaadanayaan, iyo
(j) In ay dil-sugaha saamaxayaan (cafiyayaan).

2. Haddii dhaxleyaasha marxuumku isku raacaan in loo fuliyo dilka, oo qoraal ay ku wada saxeexan yihiin ku caddeeyaan doonistooda ah in dilka lagu xukumay loogufuliyo dil-sugaha, Xeer-Ilaaliyaha Guud wuxu uu gudbinayaa Madaxweynaha xukunka la fulinayo iyo qoraalka dhaxleyaasha, si uu Madaxweynuhu u soo oggolaado fulinta dilka.

3. Haddii ay dhammaan dhaxleyaashu isku raaci waayaan in dil-sugaha loogu fuliyo dilka lagu xukumay, xukunkii dilka ahaa wuu ka jabayaa dil- sugaha, waxaana dhaxleyaasha u sugmaya in ay mag ka qaataan, iyadoo kii saamaxayaa uu qaybta uu magta ka heli lahaa ka dhaafayo kii magta ka qaadanayaana xaq u leeyahay qaadashada qaybtiisa.

4. Xaaladaha kale oo dhan waxaa loo raacayaa Qodobbada 257 iyo 258 ee Xeerka Habka Ciqaabta, waxaana dib uga go'aan gaadhaysa Maxkamadda Sare oo ah ta ikhtisaaska u leh fulinta dacwadaha dilka ah.

## Qodobka 88aad
## Fulinta Xuquuqaha Madaniga ah ee Weheliya Xukun Ciqaab ah

Xuquuqaha madani ee weheliya xukunnada ciqaabeed oo kama-dambays noqda, waxa fulintooda loo raacayaa qodobbada fulinta xukunnada ee Xeerka Habka Madaniga, waxaana reebban in qof loo xidho ama uu u sii xidhnaado xuquuqo madani ee wehelinayey xadhigga uu dhammaystay qofka lagu xukumay.

## Qodobka 89aad
## Fulinta Dacwadaha Madaniga ah

1. Dacwadaha madaniga ah waxaa fulintooda awood u leh Maxkamadaha Gobollada iyo Maxkamadaha Degmooyinka, iyadoo mid kastaa leedahay fulinta dacwadaha ay ka garsooriddeeda ikhtisaaska u leedahay.

2. Maxkamadaha awoodda u leh dacwadaha fulintu waxay fulin karaan:

(b) Xukunnada dacwadaha madaniga ee kama- dambaysta noqaday;
(t) xukunnada dacwadaha ciqaabta ee ay weheliyaan xuquuqo madani ah oo cayim ama xaddidan oo la gudan karo;
(j) Heshiisyada iyo go'aammada dhexdhexaadinta ee maxkamadi ansixisay;
(x) Xukunnada dalalka shisheeye ee si xeerka waafaqsan Maxkamad racfaan u aqoonsatay;
(kh) Heshiiska nootaayo ama qoraallada kale ee rasmiga ah ee xambaarsan balanqaad qadar lacageed oo xaddidan ee leh waqti xaddidan oo la isla oggol yahay;
(d) Heshiiska nootaayo ee aan ahayn ka lagu sheegay xubinta (kh) ee faqraddan 2aad ee qodobkan waxaa laga furan karaa dacwad madani ah, oo marka si kooban dhinacyada loo dhegeysto maxkamaddu ansixinayso, fulinayso ama baabiinayso.

## Qodobka 90aad
## Mas'uuliyadda iyo Taxadirka Looga baahan Yahay Fulinta Xukunnada

1. Garsooraha fulinaya xukun ama qoraal xoog fulineed leh, waa in uu u fuliyaa si mas'uuliyadi ku jirto, isagoo ka taxadiraya in uu abuuro dhibaato hor leh ama sababo khsaare ka culus waxa uu fulinayo.
2. Garsooraha Fulintu wuxuu ku dabran yahay in uu ku xaddidnaado nuxurka xukunka ama qoraalka xoogga fulinta leh ee uu fulinayo, isagoo u maraya qaabka ugu maan-galsan ee uu hadafka ku gaadhi karo.
3. Wax kasta oo khilaaf ka yimaaddo oo aan nuxurka qoraalka ama xukunka ku caddayn, dib baa looga garsoorayaa.
4. Xukunka la fulinyaa waa in uu cad yahay, qeexan yahay, cayiman yahay oo xaddidan yahay.

**Qodobka 91aad**
**Dirayska garsoorka**

Dirayska bahda garsoorka xilliga dacwad-qaadista, midabkiisa iyo qaabkiisa waxa xeer-nidaamiye ku soo saaraysa Guddida Cadaaladda.

**Qodobka 92aad**
**Fasaxa Garsoorka**

1. Garsoorku wuxuu leeyahay bil fasax guud ah oo ah bisha Ramadaan, iyadoo bishaa la joojinayo hawlaha garsoorka, marka laga reebo arrimaha degdegga ah iyo garsugaynta maxaabiista.
2. Bishaa fasaxa ah, dhammaan hawl-wadeennada garsoorku way nasanayaan marka laga reebo xubno kooban oo loo reebo hawlaha degdegga ah ee Maxkamad kasta iyo xafiisyada Xeer-Ilaalinta, xubnahaas oo fasaxooda qaadanaya bisha ku xigta bisha Ramadaan ama bilaha kadambeeya, xubin waliba ta ay doorato.
3. Hawl-wadeennada garsoorka ee aanay ku jirin garsooreyaasha iyo ku-xigeennada Xeer-Ilaaliyaha Guud, waxa la siin karaa fasax gaar ah oo uu oggolaanayo Guddoomiyaha Maxkamadda Sare, wixii ka badan 15 (shan iyo toban) cisho, ama Xeer- ilaaliyaha Guud marka ay tahay shaqaalaha Xafiiska Xeer-Ilaalinta oo doodayaashu ku jiraan, wixii ka yarna waxaa oggolaanaya Guddoomiyaha Maxkamadda Racfaanka ee Gobolka.
4. Marka laga reebo shaqaalaha maamulka ee Xafiiska Xeer-Ilaalinta iyo Shaqaalaha Maxkamadda Sare, fasaxyada caafimaadka iyo waxbarashada ee ka badan 30 (soddon) cisho waxaa oggolaanaysa Guddida Cadaaladda.

**Qodobka 93aad**
**Doorka Wasiirka iyo Wasaaradda Cadaaladda ee Waaxda Garsoorka**

1. Wasaaradda Cadaaladdu waxay u xilsaaran tahay fulinta go'aammada maamul ee ka soo baxa Guddida Cadaaladda.
2. Wasaaradda Cadaaladdu waxay Fulisaa go'aammada ka soo baxa Shirweynaha Garsoorka inta ka khusaysa.
3. Wasaaradda Cadaaladdu waxay ilaalin guud ku leedahay Waaxda Garsoorka, waxaanay ku ilaalisaa meel-marinta Siyaasadda, barnaamijyada Xukuumadda ee Arrimaha Garsoorka iyo habsami- ugu-dhaqanka xeerarka sugidda cadaaladda;

4. Wasiirka Cadaaladda ayaa uga wakil ah Madaxweynaha iyo Golaha Wasiirrada arrimaha Garsoorka, waxaanu:

(b) Golaha Wasiirrada ku metelaa Waaxda Garsoorka;
(t) Golaha Wasiirrada hordhigaa baahida Waaxda Garsoorka ee Guddida Cadaaladdu soo gudbiysey;
(j) Golaha Wasiirrada ka hor-difaacaa miisaaniyadda Waaxda Garsoorka;
(x) Golaha Wasiirrada uga war-bixiyaa Waaxda Garsoorka;

5. Wasaaradda Cadaaladdu waxay ka gacan-siisaa Guddida Cadaaladda fulinta iyo hirgelinta siyaasadda iyo qorsheyaasha Qaranka ee ku wajahan horumarinta iyo tayaynta Waaxda Garsoorka.

## Qodobka 94aad
## Awoodaha ay Madaxda Waaxaha Kale ee Dawladdu ku Leeyihiin Madaxda Waaxda Garsoorka iyo Xuduuddooda

1. Madaxweynaha, oo leh hab-maamuuska koowaad ee Qaranku wuxuu awood u leeyahay in uu u yeedho Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ama/iyo Guddida Cadaaladda si uu uga waraysto habsami-u-socodka hawlaha Waaxda Garsoorka, wax uga weydiiyo dhalliilaha Waaxda Garsoorka ee soo gaadha, talooyin toosin ahna uu uga siiyo habsami-u-socodka hawlaha Waaxda Garsoorka.
2. Guddoomiyaha Golaha Guurtida iyo Guddoomiyaha Golaha Wakiillada, oo kala leh hab- maamuuska labaad iyo saddexaad ee Qaranka, wuxuu mid waliba gaarkiisa ugu leeyahay Guddoomiyaha Maxkamadda Sare iyo Guddida Cadaaladda awoodda ku xusan faqradda 1aad ee Qodobkan.
3. Guddoomiyaha Golaha Guurtida iyo Guddoomiyaha Golaha Wakiilladu markay adeegsanayaan awoodda lagu siiyey faqradda 2aad ee Qodobkan, waxa ku wehelinaya kulammadaas guddiyada u kala qaabilsan arrimaha Garsoorka labada Gole ee Sharci-dejinta.
4. Waxa reebban in lagu fara-geliyo Waaxda Garsoorka hawlaheeda gaarka ah ee ay geeddi- socodkooda xeerarku jideeyeen, lagumana amri karo Guddoomiyaha iyo Guddida Cadaaladda in ay hawlaha Waaxda u gaarka ah u fuliyaan qaab ka baxsan nidaamka ay xeerarku u jideeyeen.
5. Haddii ay Guddoomiyaha ama Guddida Cadaaladda ku timaaddo faro-gelinta lagu mamnuucay faqradda 4aad ee Qodobkan:

(b) Waxa Guddoomiyaha iyo Guddida Cadaaladda ku waajib ah in ay difaacaan madax-bannaanida ay xeerarku waajibiyeen ee Waaxda Garsoorku u leedahay gudashada xilkeeda;
(t) Haddii Waaxda ay faro-gelintu kaga timi kaga hakan weydo tallaabada ku xusan xubinta "b" ee Faqraddan 5aad ee Qodobkan, waxa u bannaan Guddoomiyaha ama Guddida Cadaaladda (hadba ka faro-gelintu ku timi) in ay xaaladdaa uga warbixiyaan Waaxda dawladda ee ay faro-gelintu kaga timi mooyaane Waaxda kale, Waaxdaas oo ay waajib ku tahay in ay ka hawl-gasho wax-ka- qabashada cabashada faro-gelinta;
(j) Tallaabooyinka ku xusan xubnaha "b" iyo "t" ee Faqraddan 5aad ee Qodobkan, ee Guddoomiyuhu isku hortaagayo ama kaga cabanayo faro-gelin Waaxda Garsoorka kaga timi Waaxaha Siyaasaadda, looguma cuskan karo Guddoomiyaha ama/iyo xubnaha kale ee Guddida Cadaaladda xil-ka-qaadistooda.

**Qodobka 95aad**
**Xeer-Nidaamiyaha Xeerka Nidaamka Garsoorka**

Guddida Cadaaladdu waxay soo saaraysaa xeer- nidaamiye aan xeerkan ka hor-imanayn.

**Qodobka 96aad**
**Laalid**

Waxaa la laalay xeer kasta iyo qodob xeer oo kasta oo xeerkan ka hor-imanaya.

**Qodobka 97aad**
**Dhaqan-Galka Xeerka**

Xeerkani wuxuu dhaqan-gelayaa Marka Labada Gole ee Baarlamaanka (Golaha Guurtida iyo Golaha Wakiilladu) Ansixiyaan, Madaxweynaha Jamhuuriyada Somalilandna saxeexo.

| | |
|---|---|
| **C/risaaq Siciid Ayaanle** | **Md. Baashe Maxamed Faarax** |
| **Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada JSL** | **Gudoomiyaha Golaha Wakiillada JSL** |